JAMHUURIYADDA DIM. SOOMAALIYA

# WASAARADDA WARSHADAHA

P. O. BOX 928 - MUQDISHO
TEL. 21837 - TELEX: 747 WARSHADAHA

# Warbixinta Guud ee Warshadaha Dalka Sanadka - 1988

WAAXDA QORSHAYNTA & BAARISTA

Muqdisho - Disember, 1989

128

JAMHUURIYADDA DIM. SOOMAALIYA

# WASAARADDA WARSHADAHA

P. O. BOX 928 - MUQDISHO
TEL. 21837 - TELEX: 747 WARSHADAHA

# Warbixinta Guud ee Warshadaha Dalka Sanadka - 1988

WAAXDA QORSHAYNTA & BAARISTA

Muqdisho Disember, 1989

## TUSMADA BUUGGA.


HORDHAC GUUD - - - - - - - - - - - - - - BOGGA I-VI

Industrial Map of Somalia

LIISKA WARSHADAHA DAWLADDA

1. Warshadda Sonkorta SNAI, Jowhar ........... 1
2. " " Sonkorta Jubba Mareeray ........... 4
3. " " Caanaha Xamar ........... 6
4. " " Dharka & Suufka ........... 9
5. " " Hilibka Kismaanyo ........... 11
6. " " Sigaarka & Taraqa Xamar ........... 12
7. " " Maacuunta Xamar ........... 16
8. " " Shamentada Berbera ........... 18
9. " " Safaynta Batroolka Xamar ........... 20
10. " " Hilibka Sopral ........... 21
11. " " Bacrinta Muqdisho ........... 23
12. " " Birta Shubta Xamar ........... 25
13. " " Saliida Xamar ........... 26
14. " " Daawada Xamar ........... 28
15. " " Hargaha & Kabaha KM7 ........... 30
16. Wakaaladda Hargaha Soomaaliyed (HASA) ........... 31
17. Warshada Hargaha Kismaanyo ........... 32
18. " " " Hargeysa ........... 34
19. " " " Burco ........... 35
20. " " Gypsuimka Berbera ........... 36
21. " " Eterniga Berbera ........... 38
22. " " Kaluunka Laasqoray ........... 40
23. " " " " Qandala & Xabo ........... 42
24. " " Qaboojiyaha Berbera ........... 44
25. " " Badarka Hargeysa ........... 46
26. " " " " Baydhabo ........... 47
27. " " Burka & Bastada Muqdisho ........... 49

TUSMADA BUUGGA — BOGGA



28. Warshedda Badarka Burco ............. 51
29. " " Labanka Afgooye ............. 53
30. " " Badarka Xamar ............. 54
31. " " Habka Cusub Xamar ............. 56.
32. " " Khudaarta ITOP Afgooye ............. 58
33. " " Badarka K[1]smaanyo ............. 60
34. Wakaaladda Madbacada Qaranka Xamar ............. 61
35. Warsheda Caaga & Kartoonka INKAS Jamame ........... 62
36. Wakaaladda Xoogga Korontada Umadda ............. 64

LIISKA WARSHADAHA GAARKA AH.

37. WARShadda Sagal Juice ............ 66
38. " Biyaha Mineralka(Igar) ............ 68
39. " Nacnaca Jirde (star confectionary) ............ 70
40. " Galalka & Faylasha ............ 72
41. " Funaanadaha sharif ~~xxx~~ sano ........... 73
42. " Ifka kimikaliska ........... 75
43. " Bayl(Somali KChemical Industry) ........ 77
44. " Jawaanadda(Somali Bag Co.) ........ 79
45. " Marmarka - Xamar ........ 81
46. " Marmarka Labada Walaalaha- Muqdisho .... 83
47. " Tegola(Roof Tiles & Ridges Fac.) ..... 85
48. " Dacaska(Somali Industry workes) ...... 87
49. " Shamo Plastic & All.Plant) ......... 89
50. " New Press ........ 91
51. " Birshubida Galeyr ........ 93
52. " Somali Prefabric Building Materials).... 94
53. " Shambada & Saliida Timaha(Ramaax) ..... 95
54. " Puntland Cosmetics ....... 97
55. " Godir Sport ........ 99

TUSMADA BUUGGA. BOGGA:

56. Warshadda Hargaha & Kabaha Soomaaliyed ....... 101
(conceria e calsaturificio somala)

57. " Rinjiga & Qasaca(Svilla) ......... 103

58. " Rinjiga & Qasaca Banaadir .......... 105

59. " Rinjiga Soomaaliyeed(Iversom) ........ 107

60. " Kabaha Soomaaliyeed ........ 109
(somali Fashion shoes)

61. " Alluminiumka HCDA ....... 111

62. " Warmaash ........ 113

63. " Central Foundary ........ 115

64. " Koka-kola (N.B.C.)Coca-Cola ......... 117

65. " Guuleed Furniture ..........119

66. " Wa Haplas (Hamar Plast & Allum.) ......121

- shaxda warshadaha dalka (Tables) 123

- 1aad,2aad,3aad,4aad,5aad,6aad,7aad(A) - 7aad(B)123-132

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMALIYA

( WASAARADDA WARSHADAHA)

## WARBIXINTA GUUD EE MACLUUMAADKA WARSHADAHA DALKA 1989.

### HORDHAC:-

Wasaaradda Warshadaha waxaa caado u noqotay inay soo saarto sanad kasta buugga warbixinta guud ee Warshadaha dalka, oo looga waramo xaaladda ay ku sugan yihiin Warshadaha dalka oo u kala baxa warshaddo dawladeed & kuwo gaar ahaaneed (Private & Public). Dalkeenu hido iyo dhaqan uma laha Warshadayn, misana waxaa lagama maarmaan noqotay inuu dalku yeesho Warshaddo, Maxaa yeelay warshaddo la'aan waa horukac dhaqaale la'aan. Sida laga warqabo dal horumarkiisa waxaa laga garan karaa inta warshadood-kala duwan socda ee uu leeyahay oo ku hawlan wax soo saar Qorshaysan. Dalkeena waxaa horey looga abuuray Warshaddo farsameeya alaabta ceeriin ee wadanka laga helo iyo kuwa dibadda laga keeno si loo gaaro horumar dhaqaale, haseyeeshee himiladii laga lahaa warshadaynta oo ah haqabtirida baahida dalka weli lama gaarin laakiinse waxaa lagu socdaa tubtii lagu gaari lahaa.

Wasaaradda Warshadaha waxay la socotaa had & jeer wax soo saarka warshadaha iyo wixii mashaakil soo foodsaara, hase yeeshee ma sahlana si loo xaliyo dhibaato Warshadeed hadii aan loo haynin waxyaabihii loo baahnaa. Sidaa darteed, wasaaradda warshadaha waxay wax ka qabataa dhibaatooyinka warshadaha intii awoodeeda ah iyadoo ka hortagta dhibaatada

nooc kasta ha ahaatee, islamarkaana dejisa hab iyo hanaan loo maro xalinta dhibaatada.

Buugaan warbixin sanadeedka ee Macluumaadka warshadaha dalka wuxuu ka kooban yahay sida soo socota:-

I. Hordhac

II. Hantigelin

III . MMugga Wax soo saarka

VI . Qorshaha tacab soo saarka kiyo kan dhabta ah (Plant production & Actual Production)

V . Xaaladda dhaqaale

VI. Shaqaalaha

VII. Dhibaatooyinka

Warbixintaan waxaa loogu tala galay in si kooban loo muujiyo xaaladda guud ee Warshadaha dalka (Warshadaha dawladda iyo kuwa gaarka ah) sida heerka wax soo saarka, shaqaalaha, Maalgelinta, suuqgeynta, baahida lacagta adag, isticmaalka korontada,canshuuraha faa'iido & Khasaare.

Sida aan ogsoonahay hadafka ugu weyn ee dawladdu ka lahayd Warshadaynta dalka waxay ahayd "Horumarinta dhaqaalaha dalka" arintaan waxay salka ku haysaa :-

b). Abuuris goob shaqo, helitaanka shaqaalaha dalka inay bartaan farsamada technooloojiyada casriga ah si ay u hantaan socodsiinta warshadaha, taasoo ujeedada iyo himilada laga leeyahay tahay ka kaaftoomida aqoonyahanada ajnabiga ah & kor u qaadida aqoonta shaqaalaha Soomaaliyeed.

T). In Warshaduhu farsameeyaan alaabta ceeriin ee dalka, si looga kaaftoomo alaabta dibadda laga keeno qaarkeed oo lacag adag oo fara badan ku baxdo.

Waxaa xusid mudan in la sheego in warshadaha dalku noqdeen goob shaqo, kana shaqaysiiyeen shaqaale gaaray tirakoobkii ugu dambeeyay 10,326 qof oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadle sare, xirfadle hoose iyo shaqaale kale.

Waxaa jira in warshadaha qaarkood sida warshadda dharka & suufka balcad iyo warshadda sonkorta Mareerey laga dhex sameeyay dugsiyo farsamo, shaqaale badana ay wax ku barteen kuwa noqday farsamo-yaqaano dhexe iyo kuwa sare.

Waxaa kaloo jira in warshadaha dalka ay hortaagan yihiin dhibaatooyin fara badan kuwa ugu darana ay yihiin helis la'aan ta maalgelin iyo hantida socodsiinta (lack of investment & Working capital). Warshadaha dawladda waxaa markoodii hore lagu dhisay inay dawladda dhexe bixiso hanti-gelinta ay warshaduhu u baahan yihiin, bacdamaa ay qaadato faa'iidada & qiimo dhacaba mudada dheer ee ay warshaduhu soo jireen, lana siin jirin hantida socodsiinta, balse ay bankiyada amaah muddo gaaban ka qaadan jireen ayadoo la saaro dulsaar culays ku ah, oo aan la dhihi karin amaah warshadeed. Sida laga warqabo socodsiinta warshaduhu waxay u baahan yihiin amaah ku dhisan dulsaar khafiif ah iyo canshuur bixinta oo laga yareeyo, si badeecooyinka warshaduhu soo saaraan ula tartamaan kuwa la midka ah ee dibadda laga keeno.

Haddaba, markay warshadaha dawladdu soo shaqeeyeen sanooyin badan faa'iidadii ay dhaliyeena lagu wareejin jiray khasnadda dawladda dhexe, wax dib u maalgelin ahna aan meel loo dhigin in hadda oo ay duugoobeen makiinadihii la yiri isku filaada, taasoo aan xal u noqon karin in socodsiintoodu ay hagaagto, maxaa yeelay warshadaha badankood waxaa ku kordhay deyn fara badan oo ay saa'idisay dulsaar xad-dhaafka ah ee ku kordhaya daymaha ay bankiyadu ku leeyihiin, iyadoo xataa qiimo dhac sanooyin badan soo jiray waxna aan meel loo dhigin.

Dhibaatooyinka aan kor ku soo sheegnay awgeed iyo xaaladda guud ee dhaqaalaha dalka oo waayadaan dambe sii xumaanayay ayaan waxaan dhihi karnaa sababta dib u dhigtay horumarinta warshadeynta dalka.

Bacdamaa warshadaha dawladda xaaladoodu ay noqotay sida aan kor ku soo sheegnay ayaa wasaaradda warshadaha talo ku soo jeedisay iyadoo la socodsiisay dawladda dhexe in warshadaha loo qaybiyo kuwo istiraatiiji ah iyo kuwa kale oo caadi ah

Warshadaha Istiraatiijiga ah waxaa ka mid ah:-

1). Warshadda shamiintada berbera
2). Warshadda Sifeynta Batroolka
3). Warshadda sonkorta Mareerey
4). Warshadda sonkorta SNAI jowhar
5). Warshadda birta shubta
6). Warshadda sigaarka & taraqa.

Sidoo kale waxaa la gartay in warshadaha dawladda badankood ee aan Istiraatiijiga ahayn sida:-

1). Warshadda Somaltex

2). Warshadda maacuunta

3). Warshadda Bacrinta

4). Warshadda hilibka kismaayo

5). Warshadda Jibsuimka berbera

6). Warshadda eterniga berbera, loo helo xal munaasib ah iyadoo lagu wareejinayo cidii rabta ama wadaag la galaysa (Joint venture) dowladda soomaaliyeed. Waxaan tusaale u soo qaadanaynaa warshadda saliidda ee xamar oo shirkad Belguim ah dawladdu kula gashay heshiis wada lahaansho (Joint venture) si looga mira dhaliyo warshadaan oo in muddo ah soo jiitamay say,iyadoo alaabta ceeriin ee ay ku shaqayso laga heli karo wadanka gudihiisa.

Waxaan ku rajo weynahay in sidoo kale xal loogu helo warshadaha dawladda qaarkood oo in muddo ah gaari waayay ula-jeedadii laga lahaa. Wasaaradda warshadaha waxay diyaar u tahay inay qayb weyn ka qaadato xal u helidda warshadaha aan kor ku soo sheegnay.

Sanooyinkaan dambe waxaa dalka ka soo hana-qaaday warshadaha gaarka ah oo qaarkood ku talaabsaday horumar la taaban karo, laakiinse waayadaan dambe waxaa ciriiri galiyay helitaan la'aanta lacagta adag, iyo tas-hiilaadkii ay filayeen oo ay waayeen, sida helitaanka joogtada ah ee korontada, deynta bankiyada oo leh dulsaar hoosè oo loogu tala galay

warshadaynta dalka, si ay u gaaraan horumar dhaqaale iyo hadafkii laga lahaa abuurista warshadaha dalka.

Wasaaradda Warshaduhu waxay kaalin buuxda ka qaadatay sidii looga hortegi lahaa dhibaatooyinka waayahaan dambe soo food-saaray warshadaha qaarkood, waxayna la socodsiisay dawladda dhexe sidii xal munaasib ah loogu heli lahaa, had iyo jeerna waxay ku han weyn tahay inuu wax soo saarka warshaduhu sanadba sanadka ka dambeeya sare u kaco, si loo gaaro horumar la taaban karo.

J/LLe Axmed Maxamuud Faarax

Wasiirka Wasaaradda Warshadaha.

# INDUSTRIAL MAP OF SOMALIA




1. Cement project
2. Gypsum factory
3. Eternik (corrugated sheets)
4. Shoe and Picking plant
5. Somali Bottling (Pepsi Cola)
6. Sunshine detergents
7. Powdered detergents
8. Pickling plant
9. SNAI-BIASA: liquor, cosmetics, plastics
10. Jowhar Sugar factory
11. Somali Textiles
12. Hides and Shoe factory
13. Juba Sugar Project
14. Shoe and Tannery plant
15. Meat factory
16. Brick factory
17. ITOP: fruit and vegetable processing
18. Fish factory
19. Fish factory

# WARSHADAHA DOWLADDA

# WARSHADDA SONKORTA SNAI JAWHAR.

## 1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal gobolka sh/dhexe degmadda jawhar, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 25 Tel. 21464 Muqdisho.

Warshadaan waxay soo martay marxalado kala duwan mudadii la dhisay ee ahayd 1929, oo loogu tala galay inay shiido 30 tonnes oo qasab ah, waxaana lagu sameeyay balaarin oo wax soo saarkeedu la gaarsiiyay 220 tons inay shiido sanadkii ilaa ugu dambayntii ay gaartay ilaa 40,000 tons sanadkii marka ay shaqayso sadex kaltan, hase yeeshee sanadahaan dambe wax soo saarka warshaddu aad ayuu hoos ugu dhacay taas oo sababtay in warshadda la xiro, sababta oo ah qalabka warshadda oo duugoobay iyo beerihii qasabka oo badankood milixaystay, dib u habayna u baahan.

Hantida warshadda gashay waxay dhan tahay Sh,So, 287,438,649 oo dhammaan hantida maguurtada ah. Hawsha socodsiinta waxaa waday shirkad talyaani ah oo la yiraahdo Fonda Auto Italiano (FAI). Taasoo aynay ogeyn Maamulka warshaddu kharashka ku tala galka Shirkadda.

## 2. Mugga wax soo saarka .

Tacab soo saarkii warshadda ee sanadka 1988 wuxuu ahaa sida soo socota:-

| Magac | Unit | kutala-gal (Plan) | tacabka runta (Actual) |
|---|---|---|---|
| Sugar, | Quintals | 65,000 | 1,387 |
| Alcohol | H.I | 5,000 | 941 |
| Liquires | bottles | 325,000 | 264,759 |
| Alcohol | " | 302,000 | 286,993 |
| Omo | Carton | 40,000 | 28,588 |
| Plastic | Mise | 525,000 | 314,056 |
| Perfums | " | 36,000 | 231,262 |

Haddaba, sanadka 1988 Sonkorta warshadda oo ah 1,387 Quitals wuxuu u dhigmaa 0.35% ee mugga guud ee Warshadda, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 38 maalmood shaqo ka maqnaanshuhuna 327 maalmood. Korontada warshaddu waxay leedahay matoor gaar ah, dabka magaalada iyadaa siisa mana cadda isticmaalkeedu.

3. Alaabta ceeriin & suuq-geynta.

Qasabka ay warshaddu ku shaqayso waxaa laga beeraa agagaarka warshadda inkasta oo beeraha badankoodii ay milixeysteen, qalabka warshadduna uu duugoobay, taas oo laga garan karo wax soo saarka warshadda iyo tirada maalmaha shaqada oo ahaa 1,387 quintals iyo 38 maalmood oo shaqo.

4. Xaaladda dhaqaale.

Sahooyinkaan dambe oo dhan warshaddu waxay ku shaqaynaysay khasaare balaaran, taas oo ay keentay wax soo

saarka warshadda oo aad hoos ugu dhacay iyo shaqaalihii oo aan la sii kala dayn, iyo iyadoo kuf-kacaysay laguna hayay cusboonaysiin inkastoo kharajka aan la aqoon.

Haddaba, xaalada dhaqaale ee sanadka 1988 wuxuu ahaa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli, | Sh,So, | 285,661,023 |
| kharaj, | " " | 326,672,390 |
| Khasaaro, | " " | 41,011,367 |
| Qiimo-koror | " " | 98,621,244 |

5. Shaqaalaha.

Warshadda waxaa ka shaqeeya 1,147 qof soomaali ah & 1 ajnabi ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiya-yaal iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah j/lle aqoon-yahan beereed ah oo soomaali ah, waxayna u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici, | 13 | 0 | 13 |
| X. Sare, | 383 | 00 | 383 |
| X. Hoose, | 209 | 50 | 259 |
| Sh. kale, | 430 | 62 | 492 |
| Isugeyn guud, | 1,035 | 112 | 1,147 |

6. Dhibaatooyinka.

1. Dib u habaynta warshadda ee ay wado shirkadda FAI oo aan maamulku la socon
2. Kharajka FAI oo aan ku filayn Warshadda
3. In warshadda loo helo maalgelin balaaran & hantida socodsiinta.

# WARSHADDA SONKORTA JUBA (MAREREY)
# ( JUBA SUGER PROJECT JSP)

1. HORDHAC:-

Warshadaan waxay ku taal Goblka J/Dhexe, degmada Jilib Cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1774 Mareerey.

Warshadaan dhismaheeda waxaa la bilaabay sanadkii 1976, wuxuuna dhamaaday 1980, waqtigaa oo ay wax soo saar bilowday. Hantida guud ee gashay waxay dhan tahay USD 210 million oo sh,so, 2,483,719,000 ka mid ah yihiin hantida socodsiinta (working capital) iyadoo rateka dolarku ahaa ( USD 1 = 270/=

Dhismaha warshadda waxaa iska kaashaday dawladda soomaaliya, sanduuqa abu-dabay iyo OPEC. Qandaraaska dhismzha hawlaha kala duwan waxaa fuliyay dhawr shirkadood oo Ingiriis ah. Warshaddu ilaa hadda waxay ku shaqaysaa in ka yar muggeeda wax soo saar, waxayna sababtay beeraha qasabka oo ka yar intii laga rabay oo ah 8,000 hectars waxaana beeran ilaa 5,230 hectares waxaana daahiyay lacag la'aan, taas oo ay joojiyeen lacagihii laga sugayay sanduuqa abu-dabay, hase yeeshee, dawladda soomaaliyeed waxay ku dadaalaysaa inay dhamaystirto mashruucan.

2. Mugga wax soo saarka.

Awoodda mugga wax soo saarku waxay dhan tahay 67,000 tonnes sanadkii, marka ay shaqayso sadex kaltan 24 saacba, hase yeeshee, sidan horay u sheegnay warshaddu kuma shaqayso muggeeda buuxa, taas oo ay sabab u tahay dhul-beereedka oo aan dhamaystirnayn.

1988 warshaddu waxay muggeeda ka isticmaashay 33,959 tones oo sonkor ah iyo 15,435 tones oo molasses ah, una dhiganta 51% ee sonkorta, molasseska dibadda ayaa loo dhoofiyaa.

3. Xaaladda dhaqaale.

Xaalada dhaqaale ee warshadu sanadkaan aad ayay u fiicnayd iyadoo isticmaalka mugeedu ahaa 51% ayay muujisay faa'iido dhan SO,SHs, 767,017,000 iibka warshadda ee sanadka 1988 wuxuu ahaa sida soo socota:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SO,SHs, | 2,987,400,000 |
| Kharaj, | " " | 2,220,383,000 |
| Faa'iido | " " | 767,017,000 |

4. Shaqaalaha.

Tirada guud ee shaqaalaha Mareerey waxay dhan yihiin 2090 Soomaali ah iyo 14 ajnabi ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirradlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana guddoomiye ka ah J/LLe S/Gaas ciidamada ah.

Shaqaalaha Mareerey waxay u kala baxaan sidaan:-

| O | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici, | 62 | 1 | 63 |
| X. Sare | 404 | 0 | 404 |
| X. Hoose | 921 | 2 | 923 |
| SH. Kale | 619 | 81 | 700 |
| Isugeyn guud | 2006 | 84 | 2090 |

5. Dhibaatooyinka.

1. Warshaddu waxay u baahan tahay maalgelin, si loo dhamaystiro horumarinta beeraha.
2. Lacagta adag oo loogu baahan yahay khuburada iyo shay-kabka oo ciriiri ah.

# WARSHADDA CAANAHA XAMAR.

## 1. HORDHAC:-

Warshaddaani waxay ku taal gobolka Banaadir, degmada Hodan, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1709 tel. 80744/80375 Muqdisho.

Warshadaan waxaa lagu dhisay heshiis iskaashi dhexmaray dawladda Soomaaliya & Midowga sofiyeeti, sanadkii 1965, iyadoo warshadda loo dhisay inay dadka ku nool magaaladda xamar iyo agagaarkiisa caanaha, farmaajadda, subaga & jalaatada ka haqab-tirto, hase yeeshee, sanadkii 1983 warshaddu waa fariisatay sababtuna waa makiinadaha warshadda oo gaboobay taasoo xisaab-xirku ahaa eber, shaqaaluhuna 32 qof markii warshaddu heerkaa gaartay ayaa dawladdu qorshaysay in dib u habayn iyo balaarin lagu sameeyo, taasoo ku cadayd siyaasadii dawladda ee labadii qorshe sanadeed ee u dambeeyay. Hantida guud ee gashay waxay dhammayd ECU 4,15 million, oo u kala baxa ECU 2.56 million oo hantida ma guurtada ah iyo ECU 1.59 million oo hantida socodsiinta ah.

## 2. Mugga wax soo saarka.

Awooda wax soo saarka warshadda wuxuu gaarsiisan yahay 15,000 litre halkii kaltan. Sanadka 1988 warshaddu waxay soo saartay 3,634,000 litre oo caano ah una dhiganta 30.3% muggeeda guud iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 311 maalmood shaqo ka maqnaan-shuhuna 54 maalmood.

Korontad warshaddu isticmaashay 1988 waxay dhan tahay 363,475 KW oo ay ka gadatay WXKU kharajkeeduna yahay SH,SO, 18,173,760.

3. <u>Alaabta ceeriin & Suuq-geynta.</u>

Alaabta ceeriin ee loogu tala galay warshadda waa caano dhay ah oo ay ka hesho magaalada xamar iyo magaalooyinka u dhaw, hase yeeshee, waxaa cadaatay markii la tixgalinayo waayo aragnimadii laga dhaxlay sanadihii 1965-1983 inaan warshaddu caano ku filan ka heli karin magaalada muqdisho iyo agagaarkeeda, sidaa daraadeed qorshaha cusboonaysiinta waxaa kamid ahaa in loo sameeyo laba goobood oo ka baxsan magaaladda oo loogu uruuriyo caanaha, goobahaas oo leh qalab ka qaboojinta, lagagana soo qaado baabuur, marka lagu shubo haamo caanood.

Haddaba, maadaama warshaddu bilow tahay caano ku filana aysan helin waxay isku dartaa caano dhay ah iyo caano boore waxaana qorshaha ugu jira inay balaariso wax soo saarkeeda haddii ay maalgelin hesho, waayo waxaa lagu qiyaasay inay dabooli karto baahida gudaha xamar 10%.

4. <u>Xaaladda dhaqaale.</u>

Inkastoo warshaddu ku shaqaysay 30.3% muggeeda guud, maalmaha shaqana ahaayeen 311 maalmood haddana warshadu waxay sheegtay khasaare dhan SH,SO, 22,975,000 inkastoo ay leedahay qiimo-koror dhan 31,869,000/= waxaadna ku arki kartaa shaxda soo socota.

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | So,Shs, | 211,548,000 |
| Kharaj | " " | 234,523,000 |
| khasaare | " " | 22,975,000 |
| Qiimo-korka | " " | 31,869,000 |

5. <u>Shaqaalaha.</u>

Tirada shaqaalaha Warshaddu waxay dhan yihiin 136 qof oo soomaali ah iyo 3 ajnabi ah oo u kala baxa aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana madax ka ah J/LLe G/Sare milatery ah, waxayna u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 6 | 2 | 8 |
| X. Sare | 10 | 0 | 10 |
| X. Sare | 77 | 0 | 77 |
| Sh. Kale | 36 | 5 | 41 |
| Isugeyn guud, | 129 | 7 | 136 |

WARSHADD DHARKA & SUUFKA BALCAD

(SOMALTEX)

HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal gobolka Shabeelada dhexe degmada Balcad cinwaankeeduna waa P.O.BOX 28 tel. 22769 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa la aasaasay 21 April 1966 iyadoo ahayd "Joint venture" Soomaaliya & sadex shirkadood oo Jarmal ah maalgelinta guud ee warshaddu waxay dhan tahay SO,SHs, 736,456,283 oo u kala baxa SO,SHs, 175,426,679 hantida maguurtada ah iyo Sh,So, 561,029,604 hantida socodsiinta ah.

2. Mugga wax soo saarka.

Mugga wax soo saarka warshadda waxaa la gaarsiiyay 20 million yards oo dhar ah marka ay shaqayso sadex kaltan 24 saacba, taas oo loola jeeday ihay daboosho baahida dharka ee dalka qaarkeed, hase yeeshee sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 6 millionyards oo u dhiganta 30% muggeeda guud iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 306 maalmood shaqo ka maqnaanshuhuna 59 maalmood. Waxaa kale oo ay isticmaashay koronto qiimaheedu dhan yahay SO,SHs, 4,379,694 una dhiganta 87,593 KW oo ay ka isticmaashay matoor ay leedahay.

3. Xaaladda dhaqaale.

Sanadka 1988 warshaddu waxay keentay faa'iido dhan So,SHs, 5,522,360 una dhiganta 0.8% maalgelinta guud (Total investment) ama 9% ee gadashada (Sales) waxaa kale oo ay leedahay qiimo

koror dhan So, Shs, 2o,334,734 oo u dhiganta 2.8% ee maalgelinta ama 3% ee gadashada. Lacagta adag ee 1988 kaga baxday alaab ceeriin iyo qalab dayactir waxay dhan tahay USD : 3,100,000 oo ah sparē parts iyo Raw material laakiin macada kharajka ku baxa khubarada ajnabiga ah.

Alaabta ceeriin warshaddu waxay ka heshaa 64% wadanka gudihiisa 36% waxay kala degtaa dibadda iyo sheykabka.

4. Shaqaalaha.

Tirada guud ee shaqaalaha warshadu waxay dhan yihiin 711 qof oo soomaali ah iyo 2 ajnabi ah, oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana madax ka ah J/LLe aqoon-yahan dhaqaale ah.

Shaqaalaha warshadu waxay u kala baxaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 11 | 0 | 11 |
| X. Sare | 97 | 94 | 191 |
| X. Hoose | 200 | 83 | 283 |
| SH. Kale | 143 | 83 | 226 |
| Isugeyn guud | 451 | 260 | 711 |

# WARSHADDA HILIBKA KISMAAYO.

## 1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Jubadda Hoose degmada Kismaayo, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 6274 Tel. 2074 kismaayo.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadkii 1969 waxaana lagu dhisay dayn laga helay dalka midowga sofiyeeti, hantida guud ee gashay waxay dhan tahay SH,SO, 169,481,831 oo dhammaan hantida ma guurtada ah, waana xiran tahay hadda.

Sanadahaan dambe waxa ugu weyn ee warshaddu la fadhiday waa suuq la'aan, maadaama ay suuq-yada adduunku tartan yihiin, waxaana jiray wada hadalo ay la yeelatay dawladdo iyo hay'addo caalami ah sida dawladda masar, hay'adda Qaxootiga ee UNHCR iyo FAO, hase yeeshee, wax natiijo ah lagama gaarin, waxaase la filayaa in dhawaan ay suuq hesho waayo waxaa jira wada hadalo u socda warshadda, iyo dawladdo iyo hay'addo caalami ah oo kale.

## 2. Mugga wax soo saarka.

Mugga guud ee wax soo saarka warshaddu waa 6,000 tons oo hilib qasabadaysan ah sanadkii, waxaana loogu tala galay inay qasho sanadkii 6o,000 neef oo lo' ah ilaa 65,000 neef oo lo' ah.

Alaabta ceeriin ee warshadda waxay 100% ku salaysan tahay xoolaha nool ee dalkeena. Korontadana waxay ka heshaa matoor ay leedahay oo ay ka isticmaashay 450 KW sanadka oo dhan.

3. <u>Shaqaalaha</u>.

Tirada guud ee shaqaalaha warshaddu waxay dhan yihiin 60 qof oo dhamaan soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal iyo adeegayaal, waxayna u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 5 | 0 | 5 |
| X. Hoose | 8 | 0 | 8 |
| Sh. Kale | 40 | 6 | 46 |
| Isugeyn guud, | 54 | 6 | 60 |

## WARSHADDA SIGAARKA & TARAQA.

### 1. HORDHAC:-

Warshadaan waxay ku taal Gobolka Banaadir, degmada Hawl-wadaag, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 12 Tel. 32202 Muqdisho.

Warshadaan waxaa la dhisay sanadkii 1974, dhismaha warshadda waxaa iska kaashaday Soomaaliya iyo dawladda Shiinaha, iyadoo markaa lagu maalgeliyay Sh.So, 15,901,422, sanooyinkii 1979-80 waxaa lagu sameeyay maalgelin cusub oo dhan So,Shs, 14,400,533 taas oo ku saabsanayd inay daboosho baahida suuqa gudaha ee sigaarka hase yeeshee, hantida guud ee gashay waxay dhan tahay SH,SO, 721,993,724 oo u kala baxda So,SHs, 114,301,491 hantida maguurtada ah iyo So,SHS, 607,692,223 hantida socodsiinta.

### 2. Mugga wax soo saarka

Warshadda muggeeda wsx soo saar wuxuu dhan yahay 1,480 tons oo sigaar ah iyo 192,000 kg, oo taraq ah, marka ay shaqayso sadex kaltan 24 saacba.

Sanadka 1988 waxay soo saartay 126,370KG oo sigaar ah una dhiganta 8.5% muggeeda guud, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 240 maalmood, shaqo ka maqnaanshuhuna 125maalmood Korontada ay isticmaashay sanadka waa 75,000 KW, ay ka qaadatay WXKU laakiin ma cada isticmaalka matoorka Warshaddu.

3. <u>Xaalada dhaqaale</u>.

Inkastoo warshaddu shaqaysay 240 maalmood, haddana marka loo fiiriyo heerka isticmaalka mugga wax soo saar, aad buu u hooseeyaa waxayna gashay khasaare dhan Sh,So,5,546,926 waxayse leedhhay qiimo koror dhan SH,SO, 276,254,775 oo u dhiganta 38.2% maalgelint (Total investment) ama 45.7% ee gadashada (Sales).

Alaabta ceeriin warshaddu waxay ka heshaa 99.2% wadanka dibadiisa, 0.8% wadanka gudihiisa. Sanadka 1988 lacagta adag ee kaga baxday alaabta ceeriin iyo qalabka dayactirka waxay dhan tahay USD. 483,309.

4. <u>Shaqaalaha</u>.

Warshadda waxaa ka shaqeeya ilaa 51,209 oo dhamaantood soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal & adeegayaal, waxaana maareeye guud ka ah J/LLe haysta Diploma Machad Technico.

Shaqaalaha warshaddu waxay u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici, | 5 | 1 | 6 |
| X. Sare | 173 | 74 | 247 |
| X. Hoose | 10 | 42 | 52 |
| SH. Kale | 163 | 44 | 207 |
| Isugeyn guud | 351 | 161 | 512 |

5. Dhibaatooyinka.

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee warshadda haysta waxaa ka mid ah:-

1. Alaabta ceeriin oo aanay sanooyinkaan dambe warshadu ka haqabtirnayn, waqti habboona aan loo keenin

2. Qalab dayactir la'aan

3. Lacag adag la'aan.

WARSHADDA MAACUUNTA.

HORDHAC:-

Warshadaan waxaa dhismaheedu dhamaaday November 1979, tacab soo saarka waxay bilowday Feb. 1980. Waxaana dib u dhac uga yimid helitaanka alaabta ceeriin oo soo daahday makiinadaha iyo qalabka wax soo saarka waxaa laga iibiyay shirkad hindi ah oo la yiraahdo (Philco matalilus), hantida lagu maalgeliyay warshadda waxay dhamayd So,Shs,6,637,165 warshaddu waa xiran tahay ilaa 1986 waxaana jiray roobab dumiyay dhismaha warshadda dib ayaana loo dhisay.

2. Mugga wax soo saarka.

Mugga wax soo saarka ee warshadda loogu tala galay in-ay farsamayso waa 120 tons. Warshadani waxay soo saartaa maacuun gaaraya ilaa 20 nooc oo kaliya, suuqa gudaha baahi-diisa waxay u badan tahay ilaa 5 nooc oo kali ah, inta kalena suuq kuma laha dalka gudihiisa.

3. Alaabta ceeriin:-

Alaabta ceeriin ee warshaddu ku shaqayn jirtay dhamaan waxaa laga keeni jiray dibadda waxayna ahaayeen kuwa soo socda:-

- Ingots oo lagu shiido qaybta dhalaalinta (Faundry)
- Aluminium sheets
- Kimikadda lagu cadeeyo

4. Shaqaalaha:-

Shaqaalaha loogu tala galay waxay dhamaayeen 155 qof markii ay ku shaqaysо mugeeda buuxa hasw yeeshee, marna ma gaarin muggeeda oo buuxa oo hadda waxaa jooga 12 qof oo isugu jira xirfadlayaal, caawiyayaal iyo adeegayaal waxayna u kala baxaan sida soo socota:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Xirfadle sar, | 1 | 0 | 1 |
| Xirfadle hoose | 3 | 0 | 3 |
| Sh. Kale | 8 | 0 | 8 |
| Isugeyn guud | 12 | 0 | 12 |

5. Dhibaatooyinka:-

waxaa dumiyay warshadda roobab lixaad leh oo ka da'ay magaaladda muqdisho sanadkii 1987, laakiinse dib ayaa loo dhisay qaybta dhismaha walise hagaajin ayay u baahan tahay xagga makiinadaha iyo qalabka warshadda wali wax laguma qaban.

WAR HADDA SHAMIITADA BERBERA.

1. HORDHAC:-

Warshadaan waxay ku taal Gobolka Waqooyi galbeed degmada Berbera cinwaankeeduna waa P.O.BOX 105 tel.21304 Muqdisho.

Dhismaha warshadaan wuxuu soo jiitamayay waqti dheer, waxayna tijaabo ka baxday sanadkii 1986, iyadoo hantida dhismaha ay iska kaashadeen Soomaaliya, kuuriyada waqooyi, iyo amaah laga helay dalka faransiiska, hirgelinta dhismaha waxaa lagula heshiiyay shirkad Faransiis ah. Kharajka guud wuxuu dhan yahay SO,SHs, 5,742,125,415 oo dhamaan hanti maguurto ah.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga wax soo saarka warshaddu waa 200,000 tons sanadkii marka ay shaqayso saddex kaltan 24 saacba, taasoo dabooli karta baahida gudaha ee wadanka, iyadoo waliba inta soo hartana loogu tala galay in la dhoofiyo, waxaana loo qorsheeyay afar shirkadood oo iibiya wax soo saarka warshadda.

Sanadka 1988 warshadu waxay shaqaysay 90 maalmood, taasoo gashay xisaab-xirkii sanadka 1987, kadibna waxay u fadhiday dhibaatooyinkii ka dhacay Goboladda waqooyi bishii May.

3. Alaabta ceeriin & Suuq-geynta:-

Alaabta ceeriin ee warshaddu waxay ka kobban tahay dhagax (Lime stone), dhoobo,(Clay) iyo jeeso (Gypsuim), dhamaantoodna waxaa laga helaa wadanka, wax soo saarkana waxaa lagu isticmaalaa wadanka, wixii baahida wadanka ka badana waxaa loogu tala galay in dibaddda loo dhoofiyo.

Sidaa awgeed, 90% waxay ka heshaa wadanka 10% waxay ka heshaa dibadda.

4. Shaqaalaha:-

Warshadda waxaa ka shaqeeya ilaa 220 qof oo Soomaali ah iyo 2 ajnabi ah oo joogay afar bilood oo kaliya, waxaana maareeye ka ah J/LLe Eng. Soomaali ah waxayna u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 22 | 0 | 22 |
| X. Sare | 58 | 0 | 58 |
| X. Hoose | 20 | 5 | 25 |
| Sh. Kale | 104 | 11 | 115 |
| Isugeyn guud | 204 | 16 | 220 |

## WARSHADDA SIFAYNTA BATROOLKA XAMAR

1. HORDHAC:-

Warshadaani waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1241 tel. 81344 Muqdisho.

Warshadda waxaa la dhisay sanadkii 1978 dhismaha waxaa lagu hirgeliyay iskaashi dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya & Jamhuuriyadda Ciraaq.

Hantida guud ee gashay waxay dhan tahay 1,312,648,000/= sanadkii 1986 ayaa la kala saxiixday heshiis ah in Mulkiyadda warshadda lagu wareejiyo Soomaaliya, iyadoo amaah ahaan loo celinayo ciraaq wixii hanti hore ay u gelisay.

2. Mugga wax soo saarka.

Warshaddaan waxay ku shaqaysaa saliid ceeriin (Crude oil) oo laga keeno dibadda, sidaa awgeed waxay la kulantaa dhibaatooyin xagga helitaanka saliidda ceeriin, taas oo keenta in ay sanadkii ka shaqayso muddo yar & mug yar. Sanadkii 1988 waxay warshaddu muggeeda ka isticmaashay 6% iyadoo warshadda muggeedu yahay 500,000m/tan sanadkii.

3. Dhibaatooyinka.

1. Dhibaatada ugu weyn ee warshadda haysata waa saliid ceeriin la'aan (Lack of crude oil) waayo Raw materialka Warshadda ayaa ah saliid ceeriin.
2. helitaanka qalabka dayactirka oo ciriiri ah
3. Heerka aqoonta farsamadda shaqaalaha oo hooseysa una baahan in kor loo qaado, maadaama ay warshaddu tahay mid culus.

## WARSHADDA HILIBKA SOPRAL.

1. HORDHAC:-

Warshaddu waxay ku taal gobolka Banaadir, waxaana la dhisay sanadkii 1953, iyadoo ay maamulkeeda gacanta ku hayeen hantiilayaal Talyaani ah hase yeeshee, sanadkii 1956 ayay wax soo saar bilowday iyadoo hantida la galiyay dhamayd So,Shs, 1,000,000 oo ay lahayd shirkad Talyaani ah (Star Milano) kadib sanadkii 1978 waxay noqotay (Joint venture) wada lahaansho ay soomaalidu wax ku leedahay, waxaa kaloo deymo ku leh Bangiga Ganacsiga & Kaydka Soomaaliya oo diiday dayn danbe ilaa ay soo xaar yso laacagtii hore mana lahayn hantida socodsiinta oo waa xiran tahay.

Ujeedada laga lahaa dhismaha warshaddu waxuu ahaa:-

- Inay qasacadayso hilibka lo'da kadibna dibada loo dhoofiyo,
- Inay astaan wada shaqeyn u noqoto Soomaaliya & Talyaaniga.

2. Mugga wax soo saarka.

Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto 1000 tons oo hilib saafi ah ama inay fursanayso 60,000 neef oo lo' ah sanadkii dhibaatada ugu weyn ee warshadda helay waxaa kamid ah suuq la'aan iyo hilibka qasacadaysan sicirkiisa oo hoos u dhacay taasina ay kaliftay inay shirkadda (Star milano) ka warwareegto, bixinta hantida socodsiinta warshada sidaas darteed warshaddu waa fadhisay ilaa iyo 1984.

3. Shaqaalaha:-

Mudadii warshaddu wax soo saarka bilowday waxaa ka shaqaynayey ilaa 500 qof oo intooda badan ku-meel gaar ahaayeen kadib sanadkii 1984 shaqaalihii waa la sii kala daayay oo hadda waxaa ku sugan ilaa 15 qof oo dhamaan soomaali ah

Waxaana Maareeye ka ah J/LLe aqoon-yahan ah.

Shaqaalaha warshaddu waxay u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 4 | 0 | 4 |
| X. Hoose | 3 | 0 | 3 |
| Sh. Kale | 5 | 2 | 7 |
| Isugeyn guud | 13 | 2 | 15 |

4. <u>Dhibaatooyinka</u>:-

Warshadda Sopral ma shaqayso hadda sababtuna waa:-

- Iyadoo aan lahayn awood dhaqaale oo ay ku gadato xoolaha ay u baahan tahay,
- Bangiga oo diiday dayn sheegtayna inuu ku leeyahay dayn hore oo dhan 25 million oo ay amaahatay Shirkadda Star Milano.
- dhibaato hagga suuqa ah oo la soo daristay warshadda,
- hase yeeshee dalab fiican ayaa laga heli karaa dalalka bariga dhexe.
- sharci ahaan waa warshad ay wadaagaan soomaaliya iyo shirkad ajnabi ah, ayna adagt tahay inay soomaaliya kaligeed maalgeliso, ta soo lagu tala jiro in mulkiyadda warshadda laga saaro shirkadda Star milano si dib loogu kiciyo.

# WARSHADDA BACRINTA MUQDISHO.

## 1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal gobolka Bahaadir, dagmada wad-ajir cinwaankeeduna waa P.O.BOX 2997 tel.43097 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa dhismaheeda la bilaabay sanadkii 1980 waxaa la filayay inay wax soo saar bilowdo Sep. 1983, hase yeeshee waxay wax soo saar bilowday August 1984, hantida guud ee gashay waxay dhan tahay USD 70 million oo dhammaan hantida ma-guurtada ah hantida socodsiinta oo dhammayd So,SHs, 460 milyan waxay ka heshay Wasaaradda maaliyadda. Horaantii sanad ka 1988 warshadda waxaa joogay shaqaale dhan 198 qof oo soom-aali ah iyo 1 ajnabi ah kuwaas oo isugu jiray aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe haysta Degree dhaqaale.

## 2.. Mugga wax soo saarka:-

Warshadda waxaa loogu tala galay marka ay ku shaqayso muggeeda buuxa, ayna shaqayso sadex kaltan 24 saacba inay soo saarto 50,000 tons oo bacrin ah.

Sanadkii 1986-1988 warshaddu waa xirnayd kadib markii loo sameeyay daraasad dhaqaale iyo farsamo waxaa la go'aamiyay arrimaha soo socda:-

- Iyadoo warshaddu wayday korontada iyo alaabta ceeriin (Saliidda culus) oo ay u baahanayd haydka naaftada culus waxay ku filan yihiin ilaa 24 saac oo kaliya.
- dhibaatooyinka farsamo oo jiray xagga qaybaha wax soo saarka siiba qaybta korontada oo aan marna soo saarin muggii loogu tala galay, oo hal qura shaqaynayay halkii labo loogu tala galay, Amonia sinthesis iyo dimmineralisa-tion unit oo ka yara day tankii laga rabay.

3. Iyadoo bacrinta warshadu soo saarto aan suuq loo hayn, maadaama baahida dalkeenu aanay ka badnayn ilaa 12,000 tons sanadkii dibaddana aan loo dhoofin karin, waayo tartan lama geli karto bacrinta aduunka oo jaban maxaa yeelay warshaddaha noocaas ah ee dibadda wax u dhoofiya muggooda waxaa ugu yar ilaa 300,000 tons sanadkii.

4. Iyadoo warshaddu aanay dabooli karin kharajkeeda gudaha xitaa haddii aay ku shaqayso muggeeda buuxa (Full capacity) sidaas awgeed, sanadka 1989, horaanteeda ayaa shaqaalihii warshadda loo qaybiyay W/warshadaha iyo warshadaha kale ee dalka maadaama aanay dabooli karin baahideeda gudaha.

5. Waxaa talo lagu soo jeedinayaa in warshaddaan xal fiican loo helo si ay waxtar u yeelato waa in la helo shirkad dibadeed oo wadaag la gasha (Joint venture) dawladda Soomaaliyeed, si looga faa'iidaysto warshaddaan oo hanti fara badan la galiyay

## WARSHADDA BIRTA SHUBTA EE XAMAR.

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1411 Tel. 32173 Muqdisho.

Warshadaan waxaa la dhisay sanadkii 1975 waxaana lagu dhisay iskaashi dhexmaray dawladda Soomaaliya, iyo hay'adda UNIDO ee qaramada midoobay u qaabilsan horumarinta Warshadaha ujeedada warshadaan loo dhisay waxay ahayd inay dalka u soo saarto qalabka dayactirka warshadaha, gaadiidka & beeraha, korna u qaado farsamada shaqaalaha Soomaaliyeed, islamarkaana ka qayb-qaadato dhaqaalaha dalka.

2. Mugga wax soo saarka.

Mugga wax soo saarka warshadda wuxuu dhan yahay 450 tons marka ay ku shaqayso muggeeda buuxa sanadkii, hase yeeshee sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 26% iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 270 maalmood shaqo ka maq-naanshuhuna 95 maalmood.

3. Xaaladda dhaqaalaha:-

Warshadda birtu sanadkii 1988 waxay muujisay faa'iido dhan So,SHs, 491,522 waxaadna ku arki kartaa shaxda hoose:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | So,SHs, | 22,116,599 |
| kharaj | " " | 21,625,077 |
| Faa'iido | " " | 491,522 |

4. Shaqaalaha:-

Tiradda guud ee shaqaalaha warshaddu waxay dhan yihiin 94 qof oo Soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal iyo adeegayaal.

## WARSHADDA SALIIDDA XAMAR

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal gobolka Banaadir, cinwaankeed-una waa P.O.BOX 1412 Tel. 32701 Muqdisho.

Warshadda Saliidda dhismaheeda waxaa uu dhamaaday 1975, waxayna wax soo saar bilowday 1976.

Makiinadaha warshadda ma ahayn kuwa lacag adag laga soo bixiyay ee waxaa laga soo ururiyay dalka gudihiisa, ujeedooyinka laga lahaana waxay ahayd inay baahida saliidda ee dalka haqab-tirto, si looga kaaftoomo saliidda dibadda inooga timaada kharajka ku baxay waqtigaa wuxuu dhammaa So Shs, 3,618,864 hase yeeshee horaantii sideetamaadkii ayay fariisatay.

Haddaba, sanadka 1989, ayaa warshadda saliidda laga dhigay wada-lahaansho (Joint venture) taasoo kharajka ku baxay yahay ECU 2.4 Million lacagtaas waxaa si toos ah loo daymiyay shirkadda SOMAGRIND ECU 2.0 million
SIPEF nv, ECU 0.3 million
Somalia , ECU 0.1 million.

Lacagtaas oo ah tii ugu horaysay oo noocaas ah oo uu baxsho Bangiga Maalgelinta Europe, (EIB) waxaana loogu tala galay ayadoo la tixgalinayo (3rd Lome convention) in lagu dhiirigeliyo shirkadaha ka tirsan EECda iyo kuwa ACPda ee doonaya inay horumariyaan Mashaariicda wadalahaanshaha warshadeed.

Lacagtaas wuxuu Bangigu ka baxshay khasnada (Risk capital Resource) waxayna leedahay dulsaar lacageed oo aad loo tixgeliyay (Very Concesional Rates) .

Guud ahaan, hantida shirkadda SOMAGRIND waxay dhan tahay ECU 3.5 Milyan waxayna u kala baxdaa sidan:-

- Amaah uu bixinayo Bangiga EIB oo dhan ECU 2.0 Milyan
- Amaah ay bixinayaan Bangiyada Soomaaliyeed oo dhan ECU 0.@ Milyan
- ka-qaybgal shirkadda SIPEF (Cash) ECU o.6 Milyan

- ka-qaybgal sami Soomaaliya (Cash) ECU 0.1 Milyan
- ka-qaybgal dawladda Soomaaliya ECU 0.4 Milyan.

Warshadda waxaa loogu tala galay inay shiidd sinsinta dalka laguna gado dalka gudihiisa iyo haraaga (Maankaalka) oo dibadda loo dhoofinayo (Export).

Shaqooyinka la doonayo in warshadda laga qabto si loo cusboonaysiiyo waxaa ka mid ah:-

Dib u habaynta lagu samaynayo dhismayaasha hadda jira, laynka wax soo saarka iyo qalab cusub oo lagu rakibayo sida SILOS presses, boillers, Packing Unit, generator equipment.

Shirkadda SIPEF waxay lahaanaysaa hantida warshadda 54% Soomaaliyana 46%, shirkaddu waxay keenaysaa koox aqoon-yahano maamul & farsamayaqaano ah, waxayna gacanta ku haynaysaa dhoofitaanka maankaalka. Hirgelinta Mashruucaani waa talaabadii ugu horeysay ee ay dawladda soomaaliyeed ku doonaysay inay wareejiso hantideeda (Privatisation)of public enterprises) iyadoo tixgelinaysa siyaasadda furfurida dhaqaalaha (Economic libaralization), iyo horumarinta hantida gaar ahaaneed (Development of Private Enterprise).

Mashruucu waxaa kale oo uu ka tarjumayaa dib u habayntii lagu sameeyay sharciga maalgelinta shisheeye (Foreign investment Law), oo keenay inuu soo jiito maalgelin shisheeye.

Hirgelinta mashruucaan waxaa gacan ka gaystay Xarunta horumarinta warshadaha ee Belgium, taas oo maalgelisay daraasadihii, gacana ka gaystay habayntii sharciga wada-lahaanshaha (Joint venture Agreement), iyo wakiilka EECda u fadhiya Soomaaliya.

WARSHADDA DAAWADDA XAMAR.

1. HORDHAC:-

Warshaddaani waxay ku taal Gobolka Banaadir degmada wadajir cinwaankeeduna waa P.O.BOX 4187 tel.80985 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadkii 1985 waxayna tijaabo ka baxday 1986, warshadda waxaa maalgeliyay dawladda soomaaliya, dawladda talyaaniga, iyo suuqa dhaqaalaha reer Yurub EEC oo bixiyay 75% kharajka warshadda, dawladda talyaaniga 25%, Soomaaliya waxay bixisay kharajka gudaha oo maareynta & shaqaalahu ka mid yihiin.

2. M Maamulka warshaadda waxaa in muddo ah waday shirkad talyaani ah oo la yiraahdo (Carlo erba farma italia) iyadoo ku tala galka warshadda ay ka mid yihiin inay gaarsiiso daawadda wadamada afrikada bari.

2. Mugga wax soo saarka:-

Daawooyinka ay warshaddu soo saarto aad ayay u badan yihiin yihiin waxaana ka mid ah:- Capsules, tablets, purfusions, Ampacilins, Syrups, Ointments, suppositories, iyo kuwa kale

Sanadka 1988, warshaddu waxay muggeeda ka isticmaashay 100% iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 302, shaqo ka maqnaanshuhuna 63 maalmood. Waxaa kale oo ay warshaddu isticmaashay koronto dhan 624,150 KW oo ay ka gadatay WXKU.

Alaabta ceeriin Warshaddu waxay ka keensataa 100% wadanka dibadiisa.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Xaaladda dhaqaale ee sanadka 1988 aad ayay u fiicnayd, taasoo laga garan karo heerka isticmaalka mugga wax soo saarka oo ahaa 100% waxayna keentay Faa'iido dhan 15,910,968, taasoo u dhiganta 1.2% ee maalgelinta, ama 0.8 ee gadashadda.

Waxaa kale oo ay leedahay qiimo koror dhan 1,503,108,386

Shaxdaani waa xaaladda dhaqaale ee Warshadda daawadda:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SO,SHs, | 1,843,259,810 |
| Kharaj | " " | 1,827,347,832 |
| Faa'iido | " " | 15,910,968 |
| Qiimo-koror | " " | 1,503,108,386 |

4. Shaqaalaha:-

Tiradda guud ee shaqaalaha warshadda waxay dhan yihiin 210 qof Soomaali ah iyo 8 ajnabi ah oo isugu jira, aqoon-yahanno, xirfadlayaal, dhawiyayaal, & adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe Aqoon-yahan ah.

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 23 | 8 | 31 |
| X. Sare, | 53 | 68 | 121 |
| X. Hoose | 16 | 4 | 20 |
| Sh. Kale | 35 | 3 | 38 |
| Isugeyn guud | 127 | 83 | 210 |

## WARSHADDA HARGAHA & KABAHA KM7

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeed-una waa P.O.BOX 1230 tel. 80911 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa lagu dhisay macaawino laga helay laanta cuntada aduunka (FAO) sanadkii 1967, ujeedada laga lahaana waxay ahayd in laga dhigo dugsiga farsamada magdaynta hargaha & samaynta kabaha laguna tababaro curyaamiinta.

Hantida guud ee gashay waxay dhan tahay 192,786,033/=, oo SO,SHs, 95,359,465 kamid ahi yihiin hantida socodsiinta, sanadkii 1975 ayaa warshadda lagu soo wareejiyay Wasaaradda Warshadaha, si ay u noqoto warshad ka qayb-qaadan karta kordhinta dhaqaalaha dalka.

2. Mugga wax soo saarka.

Warshadda waxaa loogu tala galay inay farsamayso sanad kii 80,000 saamood iyo 1,050,000 harag. Sanadka 1988 warshaddu waxay muggeeda ka isticmaashay 46% iyadoo faa'iiday SO,SHs 11,119,431/= sida ku cad shaxda hoose:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SO,SHs, | 44,741,108 |
| Kharaj | " " | 33,621,677 |
| Faa'iido | " " | 11,119,431 |

Shaqaalaha :-

Tirada guud ee shaqaalaha Warshadda ee sanadka 1988 waxay ahayd 231 oo soomaali ah, oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe aqoon-yahan dhaqaale ah.

## WAKAALADDA HARGAHA SOOMAALIYEED (HASA).

### 1. HORDHAC:-

Wakaaladdu waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1181 Tel. 80210 Muqdisho.

Wakaaladda waxaa la aasaasay sanadkii 1975, kharajka maalgelinta waxaa bixiyay dawladda soomaaliyeed, hantida gashay waxay dhan tahay So, SHs, 315,321,574 oo 106,321,574/= ay tahay hantida maguurtada ah.

Wakaaladda waxaa hoos yimaada warshadaha hargaha dalka sida:-

- Warshadda hargaha & Kabaha KM7
- Warshadda Hargaha ee Kismaayo
- Warshadda Hargaha ee Burco
- Warshadda Hargaha ee Hargeysa.

### 2. Iibka sanadka 1988:-

Wakaaladda waxaa u qorshaysan inay gado sanadka 1988 3 Milyan hides/Skins, hase yeeshee waxay wakaaladdu iibisay ku tala-galkeedii 58% iyadoo shaqaysay 300 maalmood wakaaladu Hargaha waxay ka heshaa warshadaha hoos yimaada, kuwaas oo isugu jira kuwo farsamaysan iyo kuwa aan farsamaysnayn kadibna waxay u iibgeysaa wadanka gudihiisa iyo dibadiisaba.

Iibka sanadka 1988 ee Wakaaladdu wuxuu ahaa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | So,SHs, | 210,999,436 |
| Kharaj | " " | 177,700,436 |
| Faa'iido | " " | 33,299,000 |

### 3. Shaqaalaha:-

Tirada guud ee Shaqaalaha wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed ee Sanadka 1988 waxay dhan yihiin 764,qof oo Soomaali ah iyo Hal ajnabi ah, kuwaas oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal & adeegayaal.

## WARSHADDA HARGAHA KISMAAYO

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Jubbada hoose degmada Kismaayo, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 65 Tel. 2167 Kismaayo.

Warshadda waxaa la dhisay sanadkii 1977, waxaana dhismaheeda iska kaashaday Wasaaradda Warshadaha & Wasaaradda hawlaha guud, hantida guud ee gabhay waxay dhan tahay 26,854,018/= oo u kala baxa So,SHs, 16,179,998 hantida maguurtada ah iyo So,Shs, 10,674,021 oo ah hantida socodsiinta, ujeedada loo dhisay warshaddu waxay ahayd:-

- Inay horumariso farsamada hargaham noocyo kala duwana soo saarto,si ay qiimaheeda kor ugu qaado
- Inay hagaajiso hargaha qalalan kuwaas oo iyagoo tayo xun dibadda loo dhoofin jiray,
- Inay dalka soo geliso lacag adag (Hard Currency).

2. Mugga wax soo saarka:-

Awoodda wax soo saarka warshadda waxaa loogu tala galay inay soo saarto 500 harag maalintii oo lo' ah hadii ay ku shaqeyso muggeeda buuxa, taas oo sanadkii loo qorsheeyay 86,400 harag. Sanadkii 1988 wax soo saarka warshaddu wuxuu ahaq 30,419 harag, taas oo u dhiganta 35% muggeeda guud, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 288 shaqo ka maqnaanshuhuna 77 maalmood.

3. Hanti-gelinta:-

Hanti-gelinta warshadda waxaa bixiyay dawladda Soomaalida waxaana iska kaashaday wasaaradda Warshadaha & Wasaaradda hawlaha guud, Warshaddu waxay hoos tagtaa wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed oo iibgeysa hargaha ay farsamayso, una soo gada waxyaabaha ay u baahan tahay,sidaasawgeed, war shaddu lama socoto kharajka alaabta dayactirka ee u gudba. wax soo saarkeedana waxaa lagu isticmaalaa wadanka gudihiisa & dibadiisaba.

4. Xaaladda dhaqaale ee Warshadda:-

Wax soo saarka warshadda sanadkaan 1988 aad buu u fiican yahay marka loo firriyo sanadihii hore, taas oo aanay muujin

Faa'iid marka laga reebo sanadkii 1987 oo ay faa'iiday 2,870,959/=. 1988 Warshaddu waxay muujisay faa'iido dhan 16,777,440/= oo u dhiganta 33.5% ee gadashadda (Sales) ama 62.5% ee Maalgelinta (investment).

Waxaa kale oo ay warshaddu muujisay qiimo-koror dhan So,SHs, 24,926,262 oo u dhiganta 50% ee gadashada ama 93% ee maalgelinta.

Sanadka 1988 korontada warshaddu isticmaashay waxay dhan tahay 32,373KW, xaaladeeda dhaqa lana waxay ahayd sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli, | So,SHs, | 50,085,395 |
| Kharaj, | " " | 33,307,965 |
| Faa'iido | " " | 16,777,440 |
| Qiimo-koror | " " | 24,926,262 |

5. Shaqaalaha:-

Tirada shaqaalaha warshaddu waxay dhan yihiin 73 qof oo dhamaan soomaali ah oo u kala baxa aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, & adeegayaal, waxayna u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 30 | 9 | 39 |
| X. Hoose | 3 | 0 | 3 |
| Sh. Kale | 22 | 8 | 30 |
| Isugeyn guud, | 56 | 17 | 73 |

6. Dhibaatooyinka:-

- Warshaddu iyadoo ka cabanaysa helitaanka hargaha ayaa haddana, waxaa ugu darsamay qalab dayactir la'aan,
- Tababarka shaqaalaha oo hooseeya una baahan in kor loo qaado.

## WARSHADDA HARGAHA HARGEYSA.

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Waqooyi Galbeed degmada Hargeysa, cinwaankeeduna Waa P.O.BOX 365 Tel.2871 Hargeysa.

Warshaddaan waxaa lagu dhisay amaah laga helay dalka Jarmalka Bari iyo ka qaybgal ay bixisay dawladda Soomaaliyeed, waxaana la dhisay sanadkii 1978, iyadoo kharajka galay dhan yahay So,SHs, 17,045,815 oo dhamaan hantida ma guurtada ah mana laha hantida socodsiinta, waxayna hoos tagtaa Wakaaladda hargaha soomaaliyeed, waana xiran tahay hadda.

2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay farsamayso sanadkii 1,200,000 Pieces of semi-finished skins, hase yeeshee sanadka 1988 warshaddu waa fadhiday sababtuna waa dagaaladii sanadkii hore ka dhacay goboladda waqooyi ee dalka.

Alaabta ceeriin oo ah hargaha xoolaha wadanka oo ay farsamayso waxay u gudbisaa Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed oo iyaduna dibadda u iibgeysa.

3. Shaqaalaha:-

Tiradda shaqaalaha ee ku sugnaa waqtigii la xiray warshadda waxay dhamaayeen 48 qof oo dhamaan Soomaali ah, waxayna u kala baxeen sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 2 | 0 | 2 |
| X. Sare | 15 | 4 | 19 |
| X. Hoose | 10 | 5 | 15 |
| Sh. Kale | 10 | 2 | 12 |
| Isugeyn guud | 37 | 11 | 48 |

WARSHADDA HARGAHA BURCO.

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Togdheer, degmada Burco cinwaankeeduna waa P.O.BOX 367 Burco.

Warshaddaan waxaa lagu dhisay iskaashi dhexmaray dawladda Soomaaliyeed & UNDP, waxaana la dhisay sanadkii 1974, kharajka warshadda wuxuu dhan yahay So,SHs, 9,385,220 oo dhamaan hantida maguurtada ah, mana laha hantida socodsiinta, waxayna hoostagtaa Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed.

2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddaan waxaa loogu tala galay sanadkii inay farsamayso 360,000 Pieces wet blue Skins.

Sanadkii 1988 warshaddu wax ma soo saarin, waxaana sababay dhibaatadii Gobol adda waqooyi, waxayna xirnayd ilaa bishii may ee sanadka 1988.

3. Alaabta ceeriin & Suuq-geynta:-

Alaabta ceeriin ee warshaddu ku shaqayso waa hargaha Xoolaha dalkeena ilaah ku manaystay, wax soo saar-keedana waxay u gudbisaa Wakaaladda Hargaha Soomaaliyeed oo iyana dibadda u iibgeysa, qaarna dalka ayaa lagu isticmaalaa,waxaana dibadda uga yimaada sheykabka & Auxilaries.

4. Shaqaalaha:-

Tiradda guud ee shaqaalaha warshaddu waxay gaarayaan 38 qof oo dhammaan Soomaali ah, waxayna u kala baxayaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 1 | 6 | 7 |
| X. Hoose | 0 | 17 | 17 |
| Sh. Kale | 13 | 0 | 13 |
| Isugeyn guud | 15 | 23 | 38 |

## WARSHADDA JIBSIMKA BERBERA

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Waqooyi Galbeed, degmada Berbera, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 105 tel.21304 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadkii 1976, waxaana lagu maalgeliyay hanti dhan So,Shs, 3,600,000 mana laha hantida docodsiinta, waana xiran tahay.

2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddaan waxaa loogu talagalay inay farsamayso tacabka hoos ku qoran:-

- Schod chalk 30tons/Year
- Gypsuim Plaster 526tons/Year
- Orthopedic and dental Plasta 5 tons/Year
- Raw Gypsuim as apowder in agriculture
-

3. Maamulka Warshadda:-

Warshaddaani waxay ka mid tahay sadexdii warshadood ee maamulkooda la mideeyay oo kala ah Berbera Cement, Eternic and Gypsuim (Centralized Management), waxayna wadaagaan:-

- Maamulka guud
- Maamulka Lacagta & Shaqaalaha
- Korontada (Electricity)
- Shaybaarka (Laborotry)

4. Shaqaalaha:-

Tiradda shaqaalaha Warshadda waxay dhan tahay 17 qof oo Soomaali ah oo isugu jira xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxayna u kala baxaan sidan soo socota:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 3 | 0 | 3 |
| X. Hoose | 10 | 2 | 12 |
| Sh. Kale | 1 | 0 | 1 |
| Isugeyn guud | 15 | 2 | 17 |

5. Dhibaatooyinka

Dhibaatooyinka ugu waaweyn Warshadda ayna u xiran tahay waxaa ka mid ah:-

1. Suuq la'aan oo aanay warshaddu wali haysan suuq kaafiya tacabka ay soo saarto.
2. Iyadoo aanay haysan aqoon-yahano, aqoon wanaagsan leh,
3. Hantida socodsiinta oo aanay haysan ( lack of Working capital).

## WARSHADDA ETERNIGA BERBERA

1. HORDHAC:-

Warshaddaani waxay ku taal Gobolka Waqooyi Galbeed degmadda Berbera, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 105 tel. 21504 muqdisho.

Warshadda waxaa dhismaheeda ka dambeeyay fikrad uu lahaa nin khabiir ka ahaa UNIDO oo la shaqayn jiray Wakaaladda dhismaha Soomaaliyeed. Talada khabiirkaa waxaa Wasaaraddu ogolaatay sanadkii 1974, taas oo ahayd in dalka laga dhiso warshadd soo saarta Eterniga dhismaha , dhismaha warshaddu wuxuu bilaabmay 1975, wuxuuna dhamaaday 1976, iyadoo hantida gashay dhan tahay So,SHs, 19,853,000 oo dhamaan hanti ma guurto ah.

Warshadda Eterniga waxay shaqadeedu ku xiran tahay warshadda shamiitada berbera waxayna ka mid tahay sadexdii warshadood ee maamulkooda la mideeyay oo ahaa shamiitada, Eterniga iyo Gypsuimka.

1. Mugga wax soo saarka:-

Qorshaha ku tala galka warshaddu wuxuu ahaa inay soo saarto 1,000,000 oo tarniig ah sanadkii hase yeeshee, markii warshaddu tijaabo ka baxday waxaa la ogaaday inay ugu badnaan soo saari karto 500,000 xabo sanadkii marka ay shaqayso sadmx kaltan sababta oo ah in makiinadaha cajiinka soo qaada ka culus yihiin sidii laga rabay.

3. Shaqaalaha:-

Tiradda guud ee shaqaalaha warshaddu waxay dhan yihiin 22 qof oo isugu jira, aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal.

Shaqaalaha warshaddu waxay u kala baxaan sida soo socota:2

| | lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 6 | 0 | 6 |
| X. Hoose | 9 | 3 | 12 |
| Sh. Kale | 3 | 0 | 3 |
| Isugeyn guud | 19 | 3 | 22 |

4. Dhibaatooyinka:-

Dhibaatooyinka warshaddu ka cabanayso waxaa ugu waaweyn:-

- Shamiito la'aan waayo waxaa fadhiya warshadda shamiitada ,
- Hantida socodsiinta oo aysan haysan,
- Shaqaalaha Warshadda oo aqoon-tooda farsamo yar tahay.

## WARSHADDA KALUUNKA LAASQORAY.

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Sanaag, degmada laasqoray, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1093 tel. 22059 muqdisho.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadkii 1970, waxaana lagu dhisay deyn laga helay dalka Midowga Sofiyeeti, hantida guud ee gashay waxay dhan tahay, So,SHs, 52,392,126 oo u kala baxda So,SHs, 50,873,000 hantida ma-guurtada ah, iyo So,SHs, 4,518,126 oo ah hantida socodsiinta.

2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddaan waxaa loogu tala galay 6,000 tons sanadkii marka ay shaqayso saddex kaltan 24 saacba, waxayse muggeeda ka isticmaashay sanadka 1988 416 tons oo u dhiganta 7% muggeeda guud , iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 200 maalmood shaqo ka maqnaanshuhuna 165 maalmood. waxaa kale oo ay warshaddu lee dahay matoor gaar ah oo siiya biyaha iyo korontada ayan ka isticmaashay 13,040 KW.

Alaabta ceeriin ee Warshaddu waa kaluunka waxayna ka heshaa wadanka, waxayse dibadda kala soo degtaa qasacadaha iyo shey-kabka.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Sanadka 1988 warshaddu waxay muujisay Faa'iido dhan So,SHs, 4,481,503 oo u dhiganta 13% gadashada (sales) iyo 9% ee maalgelinta guud (total Investment), waxaa kale oo ay keentay qiimo-koror dhan So,SHs, 19,883,000 oo u dhiganta 55% ee gadashada (Sales) ama 38% ee maalgelinta guud.

Shaxda faa'iido & Khasaare ee Warshadda laas Qoray :-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SO,SHS, | 35,853,000 |
| Kharaj, | " " | 31,371,497 |
| Faa'iido | " " | 4,481,503 |
| Qiimo-korka | " " | 19,883,000 |

4. <u>Shaqaalaha:-</u>

Warshadda laasqoray waxaa ka shaqeeya ilaa 35 qof oo dhamaan soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahanp, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe aqoon-yahan dhaqaale ah, shaqaalaha warshaddu waxay u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 15 | 0 | 15 |
| X. Hoose | 16 | 0 | 16 |
| Sh. Kale | 3 | 0 | 3 |
| Isugeyn guud | 35 | 0 | 35 |

<u>Dhibaatooyinka:-</u>

- Warshaddu waxay ku shaqaysaa kheyraadka dalka, waxayse u baahan tahay hanti-gelin buuxda, xag qalab & doonyaba.
- Helitaanka qasacaadka iyo shidaalka oo aan joogto ahayn,
- Qalabka warshadda oo ah mid gaboobay, una baahan in la cusboonaysiiyo.

WARSHADDAHA KALUUNKA XAABO & QANDALA

1. HORDHAC:-

Warshaddahann waxaa la dhisay sanadihii 1933-1935, waxayna ku yaalaan Gobolka Bari, degmooyinka Qandala & xaabo, cinwaankooduna waa P.O.BOX 2050 Tel. 22999 Muqdisho.

Hantida guud ee gashay waxay dhan tahay So,SHs, 13,847,000 oo u kala baxsan SO,SHs, 10,847,000 hantida maguurtada ah iyo SO,SHs, 3,000,000 oo hantida socodsiinta ah.

Warshaddahaani waa heshiis wada lahaansho (Joint Venture) oo ay wada-galeen dawladda Soomaaliya iyo hantiile Soomaali ah.

Sanadka 1988 warshadda waxaa lagu sameeyay horumarin & ballaarin,, ee dhinacyada Machinery and Fishing gear oo dhan Shs, 48,000,000/= sanadka 1989, qorshaha warshaddu waa in lagu sameeyo cusboonaysiin, iyadoo loo qorsheeyay lacag dhan Shs, 229,975,000 kaas oo isugu jira maalgelin cusub iyo hantida socodsiinta.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga guud ee Warshadda loogu tala galay waxay dhan tahay 250 tons oo ah noocyo kala duwan oo kaluun ah, hase yeeshee, sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 70 tons oo kaluun kaaq duwan ah , iyadoo maalmaha Shaqadu ahaayeen 120 maalmood, shaqo ka magnaanshuhuna 245 maalmood cabirka kaluunku waa xusnacado cabirkoodu yahay 200GR. dhinacyada korontada waxay cadeeyeen inay ka isticmaashay 55 KW oo kaliya.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Inkastoo sanadihii hore warbixinta warshaduhu kala saarnayd, hadana la mideeyay warshadahaani waxay muujiyeen faa'iido dhan SO,SHs, 265,818 iyo Qiimo koror dhan So,SHs, 13,529,548 oo u dhiganta 33% ee gadashada ama 19% ee maalgelinta.

Lacagta adag ee Warshadda ka baxday sanadka 1988 waxay dhan tahay USD: 190,000 oo u kala baxda :-

| | | |
|---|---|---|
| - Raw material including Auxilaries, | USD:- | 120,000 |
| - Spare parts | USD:- | 50,000 |
| - Technical Assistance, | USD:- | 20,000 |

4. Shaqaalaha:-

Tiradda guud ee shaqaalaha warshaddu waxay dhan yihiin 160 qof oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxayna u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare, | 16 | 8 | 24 |
| X. Hoose | 13 | 0 | 13 |
| Sh. Klae | 55 | 67 | 122 |
| Isugeyn guud, | 85 | 75 | 160 |

WARSHADDA QABOOJIYAHA BERBERA.

1. HORDHAC:-

Qaboojiyahu wuxuu ku yaalaa Gobolka Waqooyi Galbeed, degmadda berbera, cinwaankiisuna waa P.O.BOX 3026, tel. 23405 Muqdisho.

Warshadda waxaa la aasaasay sanadkii 1986, iyadoo lagu dhisay deen lagu helay dalka Denmark, hantida guud ee gashay qaboojiyaha waxay dhan tahay USD:- 21,700,000 oo u kala baxda USD:- 6,000,000 hantida ma-guurtada ah iyo USD:- 15,700,000 oo ah hantida socodsiinta.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga kaydinta qaboojiyuhu wuxuu dhan ayahay 840 tons sanadkii,1988 qaboojiyaha waxaa soo galay kalluun dhan 420 tons oo u dhiganta 50% mugga guud ee qaboojiyaha, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 300 maalmood shaqo ka maqnaanshuhuna 65 maalmood.

Waxaa kale oo qaboojiyuhu isticmaalay koronto dhan 48,000 KW oo ay ka isticmaashay matoor Warshaddu leedahay.

Alaabta ceeriin ee warshadda waa kalluunka dalkeena ilaah ku manaystay, wax soo saarkana dibadda ayaa loo dhoofiyaa.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Sanadka 1988 qaboojiyahu wuxuu muujiyay khasaare dhan SO,SHs, 376,000,000. Lacagta adag ee kaga baxday qalabka dayactirka iyo Khaalmadda Khuburada shisheeye wuxuu dhan yahay USD:- 850,000 oo u kala baxda:-

- Spare parts, USD:- 100,000
- Technical Assistance USD:- 750,000

4. Shaqaalaha:-

Qaboojiyaha waxaa ka shaqeeya ilaa 150 qof oo Soomaali ah iyo 9 ajnabi ah oo dhamaantood isugu jiraan aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ha J/LLe Eng. Soomaali ah.

Shaqaalaha qaboojiyuhu waxay u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn. |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 9 | 0 | 9 |
| X. Sare | 15 | 12 | 27 |
| X. Hoose | 20 | 0 | 20 |
| Sh. Kale | 90 | 13 | 103 |
| Isugeyn guud, | 134 | 25 | 159 |

5. Dhibaatooyinka:-

1- Dhibaatada ugu weyn waa kaluun la'aan, taasoo dadkii soo qaban lahaa aad u yar yihiin:-

2- In laga dhaafo canshuurta kalluunka marka la dhoofinayo kalluunka canshuurtaas oo dhan 5%

3- In lacagta adag ee dibadda ay ka soo hoyaan la siiyo maamulka Qaboojiyaha bar, si ay dibadda uga soo gataan alaabta ay u baahan yihiin, sida (Spare parts, iyo Packaging material).

## WARSHADDA BADARKA EE HARGEYSA.

1. HORDHAC:-

Warshaddan waxay ku taal Gobolka Waqooyi Galbeed degmada Hargeysa, Warshaddaan waxay ka mid tahay warshaddo dhawr ah oo badar oo wadanka laha dhisay sanadkii 1974, kuwaas oo uu maalgeliyay Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga wax soo saarka warshaddaan wuxuu dhan yahay 432,000 Quintals oo sareen ah ama 86,400 Quintals oo galay ah, marka ay shaqayso sadex shift 24 saacba.

Sahaddahan dambe warshaddu waa xirnayd sababtuna waa hantida socodsiinta oo aanay lahayn, (Lack of Working Capital) iyo dagaaladii Bishii May ee sanadka 1988 dhacay.

Alaabta ceeriin ee Warshaddu waxay ka heshaa wadanka gudihiisa ama dibaddiisa, marka ay isticmaasho sareenaka.

3. Shaqaalaha:-

Tiradda shaqaalaha warshaddu waxay dhamaayeen 17 qof oo dhamaan Soomaali ah oo isugu jiray xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxayna u kala baxaan sidaan:_

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| X. Sare | 1 | 0 | 1 |
| X. Hoose | 4 | 0 | 4 |
| Sh. Kale | 7 | 5 | 12 |
| Isugeyn guud. | 12 | 5 | 17 |

## WARSHADDA BADARKA EE BAYDHABO.

### 1. HORDHAC:-

Warshaddan waxay ku taal Gobolka Bay, degmada Baydhabo, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 3 .

Warshaddu waxay ka mid tahay warshaddo badar oo dhawr ah oo laga hirgeliyay dalka sanadkii 1974, kuwaas oo uu maal-geliyay Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed.

Hantida guud ee lagu maalgeliyay waxay dhan tahay 2,864,668/= oo dhammaan ah hantida ma-guurtada ah, hantida socodsiinta waxaa bixiya Wakaaladda Horumarinta Beeraha (ADE) oo ay Warshaddu hoos tagto.

### 2. Mugga wax soo saarka:-

Warshadda waxaa loogu tala galay marka ay ku shaqayso muggeeda buuxa inay soo saarto 86,400 Quintal oo galay ah oo isugu jira Jariir, Budo, & Buunsho, hase yeeshee sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 4,000 Quintals oo galay ah oo u dhiganta 4.6% muggeeda guud kuwaas oo isugu jira Jariir, budo, iyo Buunsho, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 18o, shaqo ka maqnaanshuhuna 185 maalmood.

Alaabta ceeriin ee warshaddu isticmaashay oo ah galay waxay ka heshaa wadanka gudihiisa 100%.

### 3. Xaaladda dhaqaale:-

Inkastoo wax soo saarka warshaddu aad u hooseeyay, hadda-na waxay maamulka warshaddu sheegeen inay faa'iiday So,SHs, 1,655,424 oo u dhiganta 32% ee gadashada (Sales) ama 58% ee maalgelinta (investment), waxaa kale oo warshaddu leedahay qiimo-kor dhan SO,SHs, 3,525,600, haddiise si dhab ah loo raaco xisaab-xirka warshadda waxaa hubaal ah inay gashay khasaare, waayo ma jirto warshad ka faa'iidi kata 4.6% muggeeda guud.

Xaaladda dhaqaale ee warshadda Sanadka 1988 wuxuu ahaa sidan :-

| | | |
|---|---|---|
| - Dakhli | SO,SHs, | 5,200,000 |
| - Kharaj | " " | 3,544,576 |
| - Faa'iido | " " | 1,655,424 |
| -Qiimo koror | " " | 3,525,600 |

4. Shaqaalaha:-

Warshadda waxaa ka shaqeeya dad gaaraya ilaa 20 qof oo dhamaan Soomaali ah oo isugu jira xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe haysta shahaadada dugsiga sare, waxayna u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| X. Sare | 4 | 0 | 4 |
| X. Hoose | 1 | 1 | 2 |
| SH. Kale | 8 | 6 | 14 |
| Isugeyn guud | 13 | 7 | 20 |

5. Dhibaatooyinka:-

Dhibaatooyinka ugu waaweyn ee Warshadda haysta waxaa ka mid aha-

1- Qalab dayactir la'aan waayo makiinadaha warshaddu waa kuwii lagu dhisay,

2- Helitaanka alaabta ceeriin oo ciriiri ah, la'aanteedana aanay warshaddu shaqayn karin.

## WARSHADDA BURKA & BAASTADA MUQDISHO.

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1299, tel 32502 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadkii 1976, waxaana maalgeliyay Bangiga Horumarinta Soomaalida oo ay hoos tagto.

Hantida guud ee gahsy waxay dhan tahay So,SHs, 40,779,719 oo u kala baxda SO,SHs, 34,500,000 hantid ma-guurtada ah iyo SO,SHS, 6,279,719 oo ah hantida socodsiinta.

Ujeedada warshadda loo dhisay waxay ahayd inay daboosho baahida dalka ee burka iyo baastada.

2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto sanadkii 165,000 Quintals oo isugu jira bur & baasto, marka ay shaqayso sadex kaltan 24 saacba, hase yeeshee sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 108,653 Quintals, taas oo u dhiganta 66% muggeeda guud, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 270 shaqo ka maqnaanshuhuna 96 maalmood.
1988 Korontad warshaddu isticmaashay waxay dhamayd 116,060KW oo ay ka gadatay WXKU.

Alaabta ceeriin 100% waxay kala soo doo degtaa dibadda wax soo saarkeedana waxaa lagu istcmaalaa wadanka gudihiisa.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Wax soo saarkii Warshadda ee 1988 aad ayuu u fiicnaa waxayna sheegeen inay faa'iiday SO,SHS, 69,099,433 waxaa kale oo ay lee-dahay Qiimo-koror dhan SO,SHS, 59,450,950.

Shaxda hoose waxy muujinaysaa Xaaladda dhaqaale ee warshadda sanadka 1988:-

| | | |
|---|---|---|
| - Dakhli | So,SHs, | 173,944,310 |
| - Kharaj | " " | 104,894,877 |
| - Faa'iido | " " | 69,099,433 |
| -Qiimo-kor | " " | 59,450,950 |

4. Shaqaalaha:-

Warshadda waxaa ka shaqeeya ilaa 300 qof oo Soomaali ah iyo hal ajnabi ah oo isugu jiraa aqoon-yahano, xirfadlaayaal, caawiyayaal & adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe aqoon-yahan ah waxayna u kala baxaan sidaan soo socota:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 5 | 0 | 5 |
| X. Sare, | 5 | 2 | 7 |
| X. Hoose | 4 | 8 | 12 |
| SH. Kale | 228 | 48 | 276 |
| Isugeyn guud, | 242 | 58 | 300 |

WARSHADDA B DARKA BURCO.

1. HORDHAC:-

Warshaddaani waxay ku taal Gobolka Togdheer, degmada Burco, waxayna ka mid tahay warshaddo dhawr ah oo badar oo laga dhisay wadanka sanadkii 1974, kuwaas oo uu hirgaliyay Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed.

Hantida guud ee gashay waxay dhan tahay 4,538,170/= oo dhamaan hantida ma-guurtada ah.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga wax soo saarka warshadda waa 86,000 Quintals sanad kii oo galay ah, hase yeeshee sanadkii 1988 warshaddu waa fadhiday, waxaana sababay dagaaladii May ee sanadka 1988.

Alaabta ceeriin warshaddu waxay ka heli jirtay wadanka gudihiisa, wax soo saarkeedana waxaa lagu isticmaalaaa wadanka gudihiisa.

3. Shaqaalaha:-

Tiradda shaqaalaha waxay dhan yihiin 25 qof oo dhamaan Soomaali ah oo isugu jira farsamayaqaano, Caawiyayaal iyo adeegayaal, waxayna u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig9 | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| X. Sare | 2 | 1 | 3 |
| X. Hoose | 3 | 1 | 4 |
| SH. Kale | 15 | 3 | 18 |
| Isugeyn | 20 | 5 | 25 |

# WARSHADDA LABANKA AFGOOYE.

## 1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxaa la bilaabay dhismaheeda 1984, wuxuuna dhamaaday 1966, waxaa markii ugu horeysay maalgeliyay shirkad gaar ah oo Soomaaliyeed, iyadoo waqtigaa lagu maalgeliyay 3 Milyan, kadib markii uu bangigu ku yeeshay dayn badan ayuu Bankigu kala wareegay, hase yeeshee sanadkii 1984, ayaa lagu Wareejiyay Hogaanka Iskaashatooyinka oo ay hadda hoos-tagto.

Qiimaynta u dambaysay ee qalabka Warshaddu wuxuu ahaa 130,300,000, sanadihii 1986-88 warshaddu waxay u fadhiday arrimo maamul iyo farsamo, hase yeeshee sanadka 1988 warshadda waxaa la-geliyay maaliyad dhan 197,580,000 oo isugu jira dib-u habayn dhismaha Warshadda, Maiinadaha, Mushahaarka shaqaalaha, gunooyinka shaqaalaha, shidaalka, dayactirka gaadiidka iyo Mātoorada.

## 2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto 4,500,000 xabbo oo isugu jira laban iyo saqaf. Nooca saqafka warshaddu waxay ku sameysaa dalab marka ay hesho oo kaliya laakiin wax soo saarkeeda caadiga ahi waa laban.

## 3. Alaabta ceeriin & suuq-geynta:-

Alaqbta ceeriin ee Warshaddu ku shaqayso waa dhoobo iyo shidaal, dhoobada waxay ka heshaa dhulka u dhow ee degmada Afgooye, shidaal lagu qalajiyo dhoobadana waxay ka heshaa Warshadda Sifeynta Batroolka, sidaa daraadeed dibadda ugama baahna wax alaab ceeriin ah, wax soo saarkeedana waxaa lagu isticmaalaa wadanka gudihiisa.

4. <u>Shaqaalaha</u>:-

Shaqaalaha warshadda labanka ee 1988 waxay ahaayeen 18 qof oo Soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadla-yaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe dhigta Jaamacadda Ummadda.

Shaqaalaha Warshaddu waxay u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | 0 | 1 |
| X. Sare | 4 | 0 | 4 |
| X. Hoose | 6 | 0 | 6 |
| SH. Kale | 5 | 2 | 7 |
| Isugeyn guud, | 16 | 2 | 18 |

## WARSHADDA BADARKA XAMAR

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 7 Tel. 32405 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadka 1974 hantida lagu maalgeliyay waxaa bixiyay dawladda Soomaaliyeed oo uu wakiil uga ahaa Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed, iyadoo hantida guud ee gashay dhan tahay So,SHs, 10,811,425 taas oo u kala baxda So,Shs, 2,844,120 oo ah hantida socodsiinta iyo So,Shs, 7,967,305 oo ah hantida ma-guurtada ah, warshaddu waxay hoostagtaa dawladda Hoose ee xamar.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga guud ee warshadda waa 86,400 Kiintaal sanadkii sidaa darteed, warshaddu kuma shaqayso muggeeda buuxa waxaana sabab u ah helitaanka galeyda oo ciriiri ah.

Sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 7017 galley ah oo isugu jira Jariir, budo iyo buunsho, taas oo u dhiganta 8% muggeeda guud iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 120 maalmood shaqo ka maqnaanshuhuna 245 maalmood.

Waxaa kale oo oo Warshaddu isticmaashay Koronto dhan 40,596 KW oo ay ka iibsatay WXKU.

3. Alaabta ceeriin & suuq-geynta:-

Alaabta ceeriin ee warshaddu isticmaasho waa galeyda dalkeena ka baxda wax-yna ka iibsat a Wakaaladda Horumarinta Beeraha(ADC) wax soo saarkeedana waxaa lagu isticmaalaa wadanka gudihiisa, waxayna dibadda kala tinaadaa shey-kabka.

4. Xaaladda dhaqaale:-

Sanadka 1988 warshaddu waxay sheegtay inay faa'iiday Shs, 23,892,551 laakiin haddii si dhab ah loo xisaabtamo waxaa hubaal ah inaysan faa'iidin sababtuna tahay majirto warshad ka faa'iidi karta 8% muggeeda guud iyo tirada maalmaha shaqada oo ahaa 120 maalmood xisaab-xirkii warshaddu wuxuu ahaa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| - Dakhli | SHs, | 28,211,112 |
| - Kharaj | " | 4,318,641 |
| - Faa'iido | " | 23,892,551 |
| - Qiimo-koror | " | 25,572,826 |

5. Shaqaalaha:-

Warshadda waxaa ka shaqeeya 36 qof oo dhamaan soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe aqoon-yahan ah.

Shaqaalaha Warshaddu waxay u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 2 | 0 | 2 |
| X. Sare | 3 | 0 | 3 |
| X. Hoose | 7 | 1 | 9 |
| Sh. Kale | 21 | 2 | 23 |
| Isugeyn guud, | 33 | 3 | 36 |

6. Dhibaatooyinka:-

- Malaha beero u gaar ah oo galayda waxay ka iibsataa Wakaaladda horumarinta Beeraha ADC,
- Xirfadda shaqaalaha oo hooseysa una baahan tababaro,
- Malaha hanti socodsiin ku filan,
- Badarka warshadda tartan suuq kulama geli karto,

# WARSHADDA HARBKA CUSUB XAMAR.

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Banaadir, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1680 tel. 32313 Muqdisho.

Warshaddaan waxaa la dhisay sanadkii 1973, waxaana hirgeliyay dawladda Soomaaliyeed, oo uu wakiil uga ahaa Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed. Hantida lagu maalgeliyay waxay dhan tahay 103,000,000 oo u kala baxda So,SHs, 30,000,000 oo ah hantida socodsiinta iyo Sh,So, 73,000,000 oo ah hantida maguurtada ah.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga wax soo saarka warshaddu waa 280,000 xabbo dhar kala duwan ah hase yeeshee sanadka 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay 240,000 xabbo oo u dhiganta 86% ee muggeeda guud iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 275, shaqo ka maqnaanshuhuna 90 maalmood, tacab soo saarkii warshadda eesanadka 1988 wuxuu ku cad yahay shaxda hoose:-

| | Nooca(Items) | Cabirka | Qorshaha 1988 | Actual 1988 |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Surwaal | Xabbo | 50,000 | 45,000 |
| 2. | Shaar, | " | 45,000 | 40,000 |
| 3. | Foto-shaari | " | 15,000 | 12,000 |
| 4. | Goono, | " | 10,000 | 8,000 |
| 5. | Go' | " | 10,000 | 8,000 |
| 6. | Koofiyad | " | 10,000 | 10,000 |
| 7. | Funaanad | " | 10,000 | 8,500 |
| 8. | Kastuumo | " | 10,000 | 8,500 |
| 9. | Calan | " | 7,000 | 7,000 |
| 10. | Guntiino | " | 5,000 | 5,000 |
| 11, | Googarad | " | 5,000 | 5,000 |
| 12. | Canbuur | " | 3,000 | 3,000 |

3. Alaabta Ceeriin & Suuq-geynta:-

Alaabta ceeriin ee Warshaddu ku shaqayso waxay sanadkii 1987-88 ka heshay wadanka gudihiisa, gaar ahaan warshadda dharka balcad, korontada sanadka 1988 waa 2,500KW oo ay ka heshay WXKU.

4. Faa'iido & Khasaare:-

Sanadkii 1988 xisaab-xirkii Warshaddu wuxuu ahaa Sidan soo socota:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | So,SHs, | 53,756,224 |
| Kharaj, | " " | 42,237,505 |
| Faa'iido | " " | 11,418,719 |
| Qiimo-koror | " " | 22,615,968 |

5. Shaqaalaha:-

Warshadda waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 77 qof oo isugu jira Xirfadlayaal, caawiayayaal, iyo adeegayaal, waxaana maareeye ka ah J/LLe Gaashaanle Milatery ah, waxayna u kala baxaan shaqaalaha Warshaddu sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 0 | 0 | 0 |
| X. Sare | 13 | 8 | 21 |
| X. Hoose | 20 | 25 | 45 |
| SH. Kale | 5 | 6 | 11 |
| Isugeyn guud, | 38 | 39 | 77 |

## WARSHADDA KHUDAARTA AFGOOYE. ITOP
## ( ITOP )

1. HORDHAC:-

Warshaddaan waxay ku taal Gobolka Shabeeladda Hoose degmada afgooye, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1272 Tel. 9ooo4 Muqdisho.

Warshadda waxaa la dhisay 1973, kharajka dhismaha waxaa bixiyay dawladda Soomaaliyeed oo uu uga wakiil ahaa Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed, oo warshaddu markaa hoos tagaysay, hantida guud ee gashay waxay dhan tahay 43,629,384/= oo u kala baxda So,SHs, 19,879,994 hantida ma guurtada ah & So,SHs, 23,750,390 oo hantida socodsiinta ah, hadda warshaddu waxay hoos tagtaa hogaanka Iskaashatooyinka Soomaaliyeed.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga wax soo saarka Warshaddu wa 58,000 tons sanadkii marka ay shaqayso sadex shift 24 saacba, ayna wada shaqeeyaan dhamaan cabeeyayaashu, hase yeeshee sanadahaan dambe warshaddu waxay ku shaqaysaa hal cabeeye iyo hal shift, 1988 waxay muggeeda guud ka isticmaashay 6,000 tons taas oo u dhiganta 10.3% muggeeda guud iyadoo maalmaha shaqo ahaayeen 65maalmood shaqo ka maqnaanshuhuna 300 maalmood.

3. Alaabta ceeriin & suuq-geynta:-

Alaabta ceeriin ee Warshaddu ku shaqayso waa Cambe & Yaanyo, dhamaantoodna waxay ka heshaa wadanka gudihiisa, - marka la habeeyana waxaa lagu isticmaalaa wadanka gudihiisa.

4. Faa'iido & Khasaare:-

Inkastoo maalmaha shaqo aad u yar yihiin haddana mas'uuliyiinta warshaddu waxay sheegayaan inay keentay faa'iid dhan So,SHs, 7,805,907 oo u dhiganta 18% ee Maalgelinta ama 15%

ee gadashada guud, iyo qiimo-koror dhan 23,849,599/= oo u dhiganta 55% ee maalgelinta ama 48% ee gadashada guud.

Haddaba, waxaa hubal ah inaan warshaddaan ka faa'iidi karin 65 maalmood oo shaqo ah.

5. Shaqaalaha:-

Warshadda waxaa ka shaqeeya 67 qof oo dhamaan Soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, waxaana M arr eye ka ah J/lle Eng. ah.

Shaqaalaha warshaddu waxay u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 2 | 1 | 3 |
| X. Sare | 16 | 0 | 16 |
| X. Hoose | 4 | 3 | 7 |
| Sh. Kale | 34 | 7 | 41 |
| Isugeyn guud | 56 | 11 | 67 |

6. Dhibaatooyinka:-

1- Matooradda warshadda oo gaboobay una baahan dib in loo habeeyo,
2- Tababaradda shaqaalaha oo hooseeya,
3- Qalabka dayactirka oo aan lahaysan.

# WARSHADDA BADARKA KISMAAYO

1. HORDHAC:-

Warshaddaani waxay ku taal Gobolka J/Hoose degmada kismaayo, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 19 Kismaayo.

Warshaddaan waxay ka mid tahay warshaddo badar oo dhawr ah oo la dhisay sanadkii 1974, kuwaas oo uu maalgeliyay Bangiga Horumarinta Soomaaliyeed, iyadoo kharajka galay uu dhan yahay So,SHs, 4,261,979 oo dhamaan hantida maguurtada ah hantida socodsiinta waxay ka heshaa Wakaaladda horumarinta Beeraha Soomaaliyeed (ADC) oo ay Warshaddu hoos tagto.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga wax soo saarka warshaddu wuxuu dhan yahay 72,000 quintals marka ay muggeda oo buuxa ku shaqayso, hase yeeshee sanadka 1988 warshaddu wax ma soo saarin sababtuna waa:-

- Qalabka warshadda oo gabooby una baahan dayactir,
- miro la'aan heshay warshadda, waayo warshaddu malaha hantida socodsiinta, oo ay maamulka warshaddu u madax banaan yihiin,
- lacagta adag oo ciriiri ah si warshadda u hesho qalab dayactir,

4. Shaqaalaha:-

Tirada shaqaalaha jooga warshadda waxay dhamaayeen 8 qof oo soomaali ah oo isugu jira xirfadlayaal, caawiyayaal iyo adeegayaal, waxaana madax ka ah J/LLe haysta shahaadada Dugsiga Sare. Waxayna u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 0 | 0 | 0 |
| X. Sare | 2 | 0 | 2 |
| X. Hoose | 3 | 0 | 3 |
| Sh. Kale | 3 | 0 | 3 |
| Isugeyn guud | 8 | 0 | 8 |

## WAKAALADDA MADBACADA QARANKA

1. HORDHAC:-

Wakaaladda waxaa la aasaasay sanadkii 1971, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1743, Tel. 21056 Muqdisho.

Hantida guud ee Wakaaladdu waxay dhan tahay SO,SHs, 394,897,102 oo Sh,So, 92,971,973 kamid ahi yihiin hantida ma-guurtada ah iyo Sh,So, / 301,925,129 oo hantida socodsiinta ah (Working Capital).

2. Mugga wax soo saarka:-

Waxyaabaha ay warshaddu soo saarto waxaa kamid ah Buugaag,block note, Registro, Wargeyso IWM. Kuwaas oo marka laga reebo Wargeyska kuwa kale ay ku samayso dalab kaliya, maalmaha shaqada ee Wakaaladdu waa 364, maalmood oo ah sanadka oo dhan.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Sanadka 1988 Wakaalddu waxay keentay faa'iido dhan So, SHS, 485,625 iyadoo dakhli iyo kharajku ahaa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SO,SHs, | 579,938,097 |
| Kharaj, | " " | 579,452,432 |
| Faa'iido, | " " | 485,625 |

4. Shaqaalaha:-

Tirada guud ee Shaqaalaha Warshaddu waxay dhan yihiin 494 qof oo dhamaantood soomaali ah oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal & adeegayaal.

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 7 | 0 | 7 |
| X. Sare | 194 | 13 | 207 |
| X. Hoose | 190 | 0 | 190 |
| SH. Kale | 65 | 22 | 90 |
| Isugeyn guud | 459 | 35 | 494 |

## WARSHADDA CAAGA IYO KARTOONKA (INKAS-JOWHAR)

1. HORDHAC:-

Warshaddaani waxay ku taal Gobolka Jubadda Hoose magaaladda Jamaame, cinwaankeeduna waa P.O.BOX 1193 Tel.22350 Muqdisho.

Warshaddaani waa mida kali ah ee baakadaha ka samaysa dalka gudihiisa, noocyada ay samaysaana waa Kartoon iyo Plastic, waxaana loo dhisay ih lagu kaydiyo muuska la dhoofiyo, taas oo 85% ay qaadato wax soo saarkeeda SOMALFRUIT.

Maalgelinta warshaddu waxay dhan tahay So,SHs, 575,516,251 oo So,SHs, 158,272,618 ka mid ahi tahay hantida socodsiinta, warshadda waxaa la dhisay sanadkii 1973, waana (Joint venture) dawladda Soomaaliyeed iyo shirkad Talyaani ah.

2. Mugga wax soo saarka:-

Warshaddu marka ay ku shaqayso muggeeda buuxa waxay soo saari kartaa 120,000 Kiintaal oo isugu jira kartoon iyo caag plastic ah. 1988 waxay muggeeda ka isticmaashay ilaa 3,409, 015,54 KG oo isugu jira Caag iyo Kartoont taas oo u dhiganta 28% muggeeda guud iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 270 shaqo ka maqnaanshuhuna 95 maalmood.

Alaabta ceeriin warshaddu waxay ka heshaa dibadda 100% korontadana waxay leedahay matoor gaar ah.

3. Xaaladda dhaqaale:-

Inkastoo sanadahaan dambe aysan warshaddu muujin khasaare haddana sanadaan 1988 waxay muujisay khasaare aad u balaaran, waxaadna ku arki kartaa shaxda soo socota:-

| | | |
|---|---|---|
| - Dakhli | So,SHs, | 776,634,769 |
| - Kharaj | " " | 876,600,793 |
| - Khasaare | " " | 99,966,024 |
| - Qiimo-koror | " " | 116,418,814 |

4. <u>Shaqaalaha</u>:-

Tirada guud ee shaqaalaha warshadda ee sanadka 1988 waxay dhan yihiin 170 qof oo Soomaali ah iyo Hal ajnabi ah, oo isugu jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal.

Shaqaalaha warshaddu waxay u kala baxaan sidaan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamic | 3 | 0 | 3 |
| X. Sare | 3 | 0 | 3 |
| X. Hoose | 6 | 0 | 6 |
| Sh. Kale | 148 | 10 | 158 |
| Isugeyn | 160 | 10 | 170 |

## WAKAALADDA XOOGA KORONTADA UMMADDA

1. HORDHAC:-

Wakaaladdu waxay ku taal Gobolka Banaadir, waxaana la aasaasay sanadkii 1930, waxaana maalgeliyay markii ugu horeysay shirkad talyaani ah. Kadib curashadii kacaanka 21kii Oktoobar1969 balanqaadkiisii ayaa waxaa ka mid ahaa in dib loo qarameeyo hantida Ummadda.

Haddaba, 1970 ayaa warshaddu ka mid noqotay warshadihii la qarameeyay oo lala wareegay, hantida guud ee gashay waxay dhan tahay ShSo, 5,310,717,406 taas oo Sh,So,1,100,707,612 ka mid ahi yihiin hantida socodsiinta.

2. Mugga wax soo saarka:-

Mugga warshadda loogu tala galay waa 50,000 MWH oo koronto ah laakiin warshaddu ma isticmaasho muggeeda runta ah oo waxay ka isticmaashaa ilaa 30,000 - 36,000 MWH. iyadoo maalmaha shaqada ee sanadku yahay 364 maalmood.

3. Alaabta ceeriin:-

Alaabta ceeriin ee warshaddu isticmaasho waxay isugu jiraan qaar ay ka hesho dalka gudihiisam iyo qaar ah dibadda, waxayna ka kooban yihiin kuwan:-

- Matooro naafto ah (Diesel) oo ku shaqeeya saliidda culus iyo tan fudud,
- Turbinka oo ku shaqeeya biyaha badda, una badala steam dhaliya dabka (Steam generator),
- Qayb ku shaqaysa dabaysha oo shaqo bilowday 1987.

4. Shaqaalaha:-

Tirada guud ee Shaqaalaha warshadda iyo xarumaheeda gobolada iyo degmooyinka dalka waxay dhan yihiin 1027 oo isugu

Jira aqoon-yahano, xirfadlayaal, caawiyayaal, iyo adeegayaal, kuwaas oo 44 ka mid ahi yihiin ajnabi, waxaana maareeye ka ah J/LLe Eng. Soomaali ah waxayna u kala baxaan sidan:-

| | Lab | dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 28 | 2 | 30 |
| X. Sare | 332 | 5 | 337 |
| X. Hoose | 228 | 0 | 228 |
| Sh. Kale | 312 | 76 | 388 |
| Isugeyn guud | 900 | 83 | 983 |

5. Dhibaatooyinka:-

- Matooradda oo aan quwadoodu si buuxda u wada shaqaynayn,
- Magaaladda muqdisho oo aad u fideysa oo aanay isu dheelitirnayn dhismaha magaaladda & matooradda la hayo,
- Matooradda oo qaarkood gaboobeen sida kuwa (Diesel) una baahan dib u habayn,
- aqponta farsamo ee shaqaalaha oo hooseysa una baahan tababar iyo dhiiri-gelin dhaqaale,

Arrimaha aan kor ku soo sheegnay awgood,waxaa dhacday in sanadka 1988 warshaddu awood u heli wayday inay siiso magaaladda Muqdisho Koronto ku filan.

## -WARSHADDA SAGAL JUICE-

Hordhác.

Warshaddan waxaa la aasaasay sannadkii 1975, waxay ku taal gobolka Banaadir, degmada hawl wadaag.

Maal-Gelinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxa lagu maalgaliyey hanti gaaraysa Sh.-So. 5.000.000/= oo u kala baxda Sh.So.4.000.000/= oo hanti ma guurto ah & Sh.So. 1.000.000/= oo hantida socodsiinta, ah(Working Capital).

Mugga Wax Soo Saarka. Warshaddan waxaa laagu tala galay in ay soo saarto badeecaddo dhan 288.000 kaartoon oo cabitan ah sannadkii, hase yeeshee, sannadkii 1988, waxay soo saartay 43.200 kaartoon, una dhiganta 15% muggeeda wax soosaar.

Tacab Soo Saarka Warshada Sagal Juice.

| Sannad 1988 | Qorshaha tacab soo saarka (kaartoon) | tacabkii la soo saaray (kaartoon) | % inta laga helay. |
|---|---|---|---|
| Kaartoon | 144.000 | 43.200 | 30 |

Shaqaalaha. Warshaddan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 11 qofood, waxayna u kala qaybsamaan sidan:-

| | lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | – | 1 |
| X.Sare | 2 | – | 2 |
| X.Hoose | 3 | – | 3 |
| Shaqaale kale | 5 | – | 5 |
| | 11 | | 11 |

# WARSHADAHA GAARKA AH

Xaaladda Dhaqaale.

Hadii aan fiirino kharajka iyo dakhliga warshaddan, waa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | Sh.So. | 10.800.000 |
| Kharaj | " ". | 14.171.850 |
| Faa'iido/Khas | ". | (3.371.850) |

Warshaddan alaabta ceeriin ee ay ku shaqayso dhamaan, waxay ka heshaa waddanka gudihiisa.

Dhibaatooyinka:-

Warshaddaan waxay sheeganaysaa dhibaatooyinkan soo s-ocda:-

- Canshuuraha oo ku badan.
- Helitaanka biyaha iyo korontada oo aan joogto ahayn.
- Lacag adag la'aan.

## WARSHADDA BIYAHA MINERAALKA(IGAR).

Hordhac.

Warshaddaan waxay ka mid tahay warshaddaha gaarka ah waxayna ku taal Gobolka Banaadir, Degmada Yaaqshiid waxaana la aasaasay sannadkii 1985.

Hanti-Gelinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxaa lagu maal galiyey hanti dhan SH.SO. 83.164.338/= oo ah hantida wareegta ee socodsiinta (working capital). Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo - saarto 300.000 sanduuq sannadkiiba, haseyeeshee sannadkii-1988 waxay soo saartay 131.060 sanduuq oo isugu jira (Mineral Water, Oren-One Battery Water, Bilta Giuge cone,Syrup Sulph acid,MixRadiator Sal), una dhiganta 44% ee muggeedda wax soo saar sanadkii 1988 warshaddu waxay soo shaqaysay - 310 maalmood.

Tacab Soo Saarka Warshadda.

| Sannad | Qorshihii tacab soo saarka(sanduuq) | Tacabkii la soo saaray (sanduuq) | % inta laga helay |
|---|---|---|---|
| Mineral Water Oren-One | 138.225 | 131060 | 94% |

Shaqaalaha. Warshaddaan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 30 qofood oo isugu jira:-

| | Lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | - | - | - |
| X.Sare | 4 | - | 4 |
| X.Hoose | 16 | - | 16 |
| Shaqaale kale | 4 | 6 | 10 |
| | | 30 | 30 |

Xaaladda Dahqaale. Hadii aan fiirino faa'iidada & khasaaraha warshaddaan ee sannadkii 1988 waa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SH.SO. | 57660694 |
| Kharaj | " ". | 39969645 |
| Faa'iido/khasare | " ". | 17.691.049 |

Warshaddu waxay samaysay qiimo koror dhan (V.A)SH.SO. 3678736, warshaddu waxay isticmaashay koronto dhan 198400 KW oo ay dhalisay.

Warshaddu alaabta ceeriin oo ay ku shaqayso waxay ka heshaa waddanka guddihiisa 20% & 80% dibadda ah.

Dhibaatooyinka.

Warshaddu waxay sheeganaysaa dhibaatooyinkan:-

- Ka helitaanka lacagta adag ee goobaha rasmiga ah oo yar
- Helitaanka biyo nadiif ah oo yar.

WARSHADDA NAC-NACA JIRDE

.(Star Confectionary).

Hordhac.

Warshaddaan waxay ka mid tahay Warshadaha gaarka ah ee dalka ka furan, waxayna ku taal Gobolka Banaadir, deg-madda C/Casiis S.B. 557, Tel 21716, waxaana la aasaasay s-annadkii 1972.

Hatinti-Gelinta Warshadda & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxa lagu maalgaliyey hanti lagu qiyaas-ay Sh.So. 29.000.000/= oo Shamaan hanti ma guurto ah. W-arshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto mug dh-an 600 Tons ah noocyo kala duwan oo Nac-Nac & Shukulaato ah sannadkiiba laakiin sannadkii 1988 waxay soo saartay 150 Tons una dhiganta 25% muggeeda wax soo saarka.

Sannadkii 1988 warshaddu waxay shaqaysay 180 maalm-ood oo kaliya, isku celceliska shaqo ka maqnaanshuhuna, waxay dhamayd 20 maalmood.

Tacab Soo Saarka Warshadda.

| Sannadkii 1988 | Qorshaha tacab Soo saarka (per Tons) | Tacabkii la soo saaray | % |
|---|---|---|---|
| Nac-Nac | 350 Tons | 150 T6ns | 43% |

Shaqaalaha.- Warshaddan waxa ka shaqeeya shaqaale tirado-du dhan tahay 42 qofood oo isgu jira:-

| | Lab | Dheddig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | _ | 1 |
| X.Sare | 6 | _ | 6 |
| X. Hoose | 27 | 4 | 31 |
| Shaqaale kale | 4 | _ | 4 |
| | 38 | 4 | 42 |

Xaaladda Dhaqaale.

Xagga dhaqaalaha warshadda ee sannadkii 1988 waa sida hoos ku qoran:-

| | |
|---|---|
| Dakhli SH.SC. | 45.000.000 |
| Kharaj " ". | 23.508.079 |
| Faa'iido/Khas. SH.SC. | 21.491.921 |

Warshaddu waxay kaloo ay leedahay qiimo koror (V.A) gaaray SH.SC. 26.719.921 warshaddu waxay isticmaashay koronto dhan 150.097 KW oo ay ka heshay W.X.K.Ummadda alaabadda ceeriin oo ay warshaddu ku shaqayso sonkorta mooyee inta kale dibadda ayey ka keensataa.

Dhibaatooyinka.

- Lacag adag la'aan, canshuuraha oo ku badan, qiimaha alaabta guddaha oo kor u kacday, qiimaha cududa shaqaale oo korodhay.

Hordhac. WARSHADDA GALALKA & FAYLASHA.

Warshaddaan waxay ka mid tahay Warshadaha gaar ahaa-eed, waxay ku taal Gobolka Banaadir Degmada Hawl Wadaag, waxaa la aasaasay sannadkii 1977, waxayna soo saartaa fa-ylasha & Baqshadaha.

Hanti-Galinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxa lagu maal-galiyey inay soo saarto T. 7000.000/= oo badeeco isgu jirta faylal & Baqshado. Sanadk-ii 1988 waxay soo saartay 3000.000, una dhiganta 43% mug-geeda wax soo saar.

Tacab Soo Saarka Warshadda Galalka & F.

| Sannad | Qorshaha tacab soo saarka(peces) | Tacabkii la soo saaray (peces) | % inta la ga helay |
|---|---|---|---|
| 1988 | 6.000.000 | 3.000.000 | 50% |

Shaqaalaha. Warshaddaan waxaa ka shaqeeya 15 qofood oo dhamaantood lab ah una kala baxa sidan:-

| | |
|---|---|
| Maamule | 1 qof |
| Farsamayaqaan | 10 " |
| Karani | 1 " |
| Ageegayaal | 3 " |

Xaaladda Dhaqaale. 15

Hadii aan fiirino dakhliga warshadda sanadkii 1988, waa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SH.SO. | 95.000.000 |
| Kharaj | " ". | 63.954.000 |
| Faa'iido/Khas. | " ". | 31.046.000 |

Dhibaatooyin.

- Lacag yaraan oo si fiican loogu socodsiiyo.
- Canshuurta oo ku badan.

WARSHADDA FUNANADAHA

SHARIIF SEENO.

Hordhac.

Warshaddaani waxay ka mid tahay warshadaha gaarka ah, ee dalka ka furan waxayna ku taal Gobolka Banaadir degmada Shingaani P.O.Box 1317 Tel.20121, waxaana la aasaasay sanadkii 1983.

Maal-Gelinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxa lagu maal-galiyey hanti dhan SH.SO.-600.000 oo isugu jira 588000/= oo ma guurto ah & SH.SO.12+000/= oo ah hantida wareegta ee socodsiinta (working capit-at).Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto sannadkii 50.000 oo isugu jira (funaanado,matantayaal,tuuto gran),hase yeeshee sanadkii 1988 waxay soo soo saartay 2586, una dhiganta 5% ee muggeeda wax soo saar. Sannadkii1988 warshaddu waxay shaqaysay 180 maalmood.

Tacab Soo Saarka Warshadda.

| Sannad | Qorshaha tacab soo saarka | Tacabkii la soo saaray | % inta lag a helay |
|---|---|---|---|
| 1988 | 5500 | 2586 | 47% |

Shaqaalaha. Warshaddaan waxa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 5 qofood .

Xaaladda Dhaqaale. Hadii aan fiirino faa'iidada & khasaaraha warshaddaan ee sanadkii 1988 waa sidan:-

| | |
|---|---|
| Dakhli | SH.SO. 233.360 |
| Kharaj | " ".84632.265 |
| Faa'iido/Khas. | " ". (84.398.905) |

Warshaddaaan waxay alaabta ka heshaa 50% wadanka dibadiisa & 50% guddihiisa dhinaca korontada waxay warshadu isticmaashay koronto dhan 2400 KW oo ay ka heshay W.X.K.Ummadda.

## DHIBAATOOYINKA WARSHADDA.

Warshaddu waxay sheeganaysaa dhibaatooyinkan soo soc-da:-

- Alaabta Ceeriin oo ay warshaddu Somaleax ka heli jirt-ay hadda kama hesho;
- Sidaas darteed warshaddu hadda ma shaqayso;
- Lama ogo in mustaqbalka dib loo furi doono & in kale.

## WARSHADDA IFKA KEMIKAALISKA.

### Hordhac.

Warshaddan waxay ku taal Gobolka Banaadir, Degmada W-ardhiigley waxaana la aasaasay sannadkii 1974.

### Hanti-Galinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxa lagu maal galiyey hanti dhan SH.SO. 25.000.000/= oo u kala baxda SH.SO. 21.800.000/= oo hanti ma guuro ah iyo SH.SO. 3.200.000/= oo hanti socodsiinta ah Working Capital.

### Tacab Soo Saarka.

Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto sa... anndkii badeeco dhan 133.000 xabbo (peces) oo ifka acqua, raggio, ifka tox, neokiller, alfacid & ifka xalane.
Hase yeeshee 1988 waxay soo saartay 42152 xabbo, una dhiganta 32% muggeeda wax soo saar.

Tacab Soo Saarka Warshadda Ifka Kemikada.

| Sanadkii | Qorshaha tacab soo saarka (peces) | Tacabkii la soo saaray (peces) | % inta laga helay |
|---|---|---|---|
| 1988 | 90.000 | 42.152 | 47% |

**Shaqaalaha.** Warshaddaan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 30 qofood waxayna u kala qayb samaan:-

| | Lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | _ | 1 |
| X. Sare | 10 | _ | 10 |
| X. Hoose | 16 | _ | 16 |
| Shaqaale kale | 3 | _ | 3 |
| | 30 | | 30 |

## Xaaladda Dhaqaale.

Hadii aan fiirino kharajka & dakhliga warsh-addaan ee sannadkii 1988 waa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SH.SO. | 4.841.530 |
| Kharaj | SH.SO. | 6.904.797 |
| Faa'iido/Khas. | " ". | (2.063.267) |

## Dhibaatooyinka.

Koronto La'aan Canshuurha oo ku badan.

## WARSHADDA BAYL

## (SomaliChemical Industry)

### Hordhac.

Warshaddaan waxay ka mid tahay warshadaha gaarka ah, ee wadanka guddihiisa ka furan kuwa ugu waaweyn, waxayna, ku taal Gobolka Banaadir Degmada Waaberi, waxaana la aasaasay sanadkii 1969, cinwaankeeduna waa B.O.Box 479, Tel.80+ 557 muqdisho.

### Hanti-Galinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxaa lagu maalgaliyey hanti gaaraysa ilaa 510.000.000/= oo u kala baxda SH.SO. 416.636.311/= oo ah hantida maguurtada ah & SH.SO. 93.363.689/= oo ah(working-capital).hantida wareegta ee socodsiinta.

### Tacab Soo Saarka Warshadda.

| Sannadkii 88 | Qorshaha tacab soo saarka(cartons) | Tacabkii la soo saaray,(cart.) | % inta laga,H. |
|---|---|---|---|
| Saabuunta Budada (Detergent) | 2.400.000 | 960.000 | 40% |

### Shaqaalaha Warshadda.

Warshaddaan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya ilaa-80 qofood oo isugu jira:-

| | Lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 3 | 1 | 4 |
| X.Sare | 9 | 6 | 15 |
| X.Hoose | 40 | 19 | 2 |
| SHaqaale kale | - | 2 | 2 |
| | 52 | 28 | 80 |

Xaaladda Dhaqaale.

Hadii aan fiirino faa'iidada & khasaaraha Warshadaan, sannadkii 1988 waa sidan:-

| | |
|---|---|
| Dakhli | SH.SO. 31.926.444 |
| Kkaraj | SH.SO. 48.914.065 |
| Faa'iido/Khas. | ". ".(16.987.621) |

warshaddu waxay lahayd qiimo koror (V...) dhan (5.839.199). warshaddu alaabta ceeriin oo ay ku shaqayso waxay ka heshaa 25% guddaha, 75% dibadda. Qiimaha alaabta ceeriin & shey-kabka warshaddu u baahan tahay waxaa lagu yeeshay US$-667.

Dhibaatooyinka.

Warshaddan waxaa haysta dhibaatooyin kala duwan sida warshadaha kale ee gaarka ah ee Dalka ka jira.
Alaabta ceeriin oo ay ku shaqayso waa "Chemicals, oo dibada looga keeno taasuna waxay u baahan tahay "lacag adag oo heliteenkeeda dhibaato ay kala kulanto.

WARSHADDA JAWAANADA SOOMAALIYEED.

(Somali Bag Company)

Hordhac.

Warshaddaan waxay ka mid tahay warshadaha gaar ahaaneed waxaana la aasaasay sannadkii 1987, waxayna ku taal Gobolka Banaadir Degmada Wardhiigley, cinwaankeedu waa BX B.O.Box 824 Tel.34099/35020.

Hanti-Galinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxaa lagu maalgaliyey hanti gaaraysa SH.+ SO. 636.058.733, una kala baxda SH.SO. 2688887.957 oo ah hanti ma guurto ah & SH.SO. 3671.70776 oo ah hantida wareegta ee socodsiinta.

Mugga Wax Soo Saarka. Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto 3.5Million Sacks per annum, hase-yeeshee, sannadkii 1988 waxay soo saartay 1.859.000 Sacks oo u dhiganta 53% ee muggeeda wax soo saar. Warshaddan waxay shaqeysay sanadkii 1988 309 maalmood, korontada ay isticmaasho waxay ka heshaa W.X.K.U. waxayna dhantahay 465.-239KW & 117.555KW oo ay dhalisay.

Tacab Soo Saarka Warshadda.

| Sannad | Qorshaha Tacab soo saarka (Sacks)jawaano | Tacabkii la soo saaray (Sacks) | % inta laga helay |
|---|---|---|---|
| Jawaano | 1.500.000 | 1.859.000 | 123% |

Shaqaalaha:- Warshaddaan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 113 oo u kala ah:-

| | Lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 2 | - | 2 |
| X.Sare | 12 | - | 12 |
| X.Hoose | 81 | 8 | 89 |
| Shaqaale kale | 8 | 2 | 10 |
| | 103 | 10 | 113 |

X

Xaaladda Dhaqaale.

Hadii aan fiirino faa'iidada & khasaaraha warshaddaan ee sannadkii 1988 waa sidan soo socota:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SH.SO. | 181.894.054 |
| Kkaraj | SH.SO. | 247.824.662 |
| Faa'iido/Khas. | ". ". | 65.930.608 |

Warshaddani waxay alaabra ceeriin ka heshaa 20% wadanka dudihiisa, 80% kalane dibadda.

Dhibaatooyinka.

Warshaddan waxay sheeganaysaa lacag adag la'aan, si ay iga bixiso deymanka dibadda looga leeyahay.

## WARSHADDA MARMARKA XAMAR.

### Hordhac.

Warshadaan waxay ka mid tahay warshadaha gaar ahaaned "Scale, waxayna ku taal Gobolka Banaadir Deg. wadajir, waxaana la aasaasay sannadkii 1975, waxaana lagu maalgaliyey hanti dhan SH.SO. 7000.000/= oo u kala baxda SH.SO. 4.653.-173/= oo ah ma guurto & SH.SO. 2.346.827/= oo ah hantida wareegta ee socodsiinta "working capital".

### Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan waxaa loogu tala galay inay soo saarto 12.000MQ oo ah "Scale" sannadkiiba, hase yeeshee, sannadkii , 1988 waxay soo saartay 5.000MQ, una dhiganta 42% ee mugga wax soo saarkeeda, sannadkii 1988 warshaddu waxay shaqaysay 200 oo maalmood.

Tacab Soo Saarka Warshadda.

| Sannadkii 1988. | Qorshaha tacab soo saarka (perMQ) | Tacabkii la soo saaray(perMQ) | % inta laga helay |
|---|---|---|---|
| Scale MQ | 12.000 | 5.000 | 42% |

N.B Maadaama ay warshaddu wax ku soo saarto by order oo aanay lahayn "annual production plan" waxa lagu qiyaasay, Mugga wax soo saarka warshadda & wax soo saarkii 1988kii.

Shaqaalaha. Warshaddaan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 50 qofood oo isugu jira:-

| | Lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | -- | 1 |
| X.Sare | 1 | -- | 1 |
| X.Hoose | 44 | 3-- | 47 |
| Shaqaale kale | 1 | -- | 1 |
| | 47 | 3 | 50 |

Xaaladda Dhaqaale.

Hadii aan fiirino faa'iidada & khasaaraha ee sannadkii 88 waa sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SH.SO. | 7.961.855 |
| Kkaraj | SH.SO. | 5.857.603 |
| Faa'iido/Khas. | " ." | 2.104.252 |

Warshaddu waxay kaloo ay samaysay qiimo koror dhan SH.SO. 3.389.239, warshaddu waxay sannadkii 1988 isticmaashay koronto qiimaheedu dhan yahay SH.SO. 176.758 oo ay ka heshay W.X.K.U. warshaddu alaabta ceeriin oo ay ku shaqayso, waxay ka heshaa 25% guddaha 75% dibadda.

Dhibaatooyinka. Warshaddu waxay sheeganaysaa dhibaatooyinkan:-

- Makiinadaha oo u baahan in la bedelo,
- Lacag adag la'aan, shidaalka & korontada oo ku yar.

WARSHADDA MARMARKA LABADA WALAALAHA.

Hordhac.

Warshaddaan waxay ka mid tahay Warshadaha gaarka ee dalka ka furan, waxayna ku taal Gobolka Banaadir, degmada Hodan waxaana la aasaasay sannadkii 1988.

Hanti-Gelinta & Mugga Wax Soo Saarka.

Warshaddaan Waxaa lagu maalgaliyey hanti gaaraysa SH. SO. 125.000.000/= oo u kala baxda SH.SO. 78.200.000/= oo- hanti ma-guurto ah inta hartayna waa hantida warqegta ee socodsiinta (working capital).

Tacab Soo Saarka/ Warshaddaan waxaa loogu tala galay in ay soo saarto sannadkii 60.000MQ(Scale). hase yeeshee sannadkii 1988 waxay soo saartay 5.000MQ, iyadoo maalmaha shaqadu ahaayeen 90 maalmood, taasoo wax soo saarka u dhigmo 8% muggeeda wax soo saarka.

Tacab Soo Saarka.

| Sannad | Qorshaha wax soo saarka | Tacabkii la soo saaray MQ | % inta laga helay. |
|---|---|---|---|
| 1988 | 20.000 | 5.000 | 25% |

Shaqaalaha.

Warshaddaan waxaa ka shaqeeya shaqaale gaaraya 40 qofood, waxayna u qaybsamaan sidan:-

| | Lab | Dhedig | Isugeyn |
|---|---|---|---|
| Jaamici | 1 | - | 1 |
| X.Sare | 3 | - | 3 |
| X.Hoose | 2 | -- | 2 |
| Shaqaale kale. | 34 | - | 34 |
| | 40 | | 40 |

Xaaladda Dhaqaale.

Hadii aan fiirino xaaladda dhaqaale Warshaddaan waa, sidan:-

| | | |
|---|---|---|
| Dakhli | SH.SO. | 15.000.000 |
| Kkaraj | " " . | 5.835.610 |
| Faa'iido/Khas. | " " . | (9.164.390) |

Dhibaatooyinka:

- Canshuuraha oo ku baddan
- Kala go'a korontada & Biyaha
- Baahi Lacag adag.

